Degaanka

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

FAAFINTA الجريدة الرسمية RASMIGA

DAWLAD A PUNTLAND EE SOOMALIA
لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 19-aad. Garowe .19/8/2017. Lam.8.

Faafintabilwalbasoobaxda جريدة الشهرية

*QaybtFaafintaRasmiga ah eeMadaxtooyadaDawladda Puntland*

QiimuhuwaaSh.So 10,000 rukunwalba . SanadkiiwaaSh.So 170,000 dalkagudihiisa, dalkadibaddiisaSh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyaywuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaanF.Rhalkiisadariyowixii ka yarwaaSh.So 3,000, rukunkaiyoqoritaankawaxaa la waydiistaaqeybtamaamulkaFaafinta rasmiga ah. Lacagtawaxaalagubixinayaaxafiiskacanshuurahabarrigaeewasaaraddamaaliyadda.

---

TUSMADA

QaybtaKoowaad

Ansixinta Xeerka ilaalinta iyo maareynta deegaanka puntland.

Qaybtalabaad

Xeer

Waxba ma leh

QeybtaSaddexaad\

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.

Waxba ma leh

*Xeer LR .5. ee 19/8/2017, kunasaabsan ansixinta Xeerka ilaalinta iyo maareynta Deegaanka puntland.*

Dawladda Puntland ee Somaliya | Puntland State of Somalia

Xeerka Lr.5. ee20/8/2017, kuna saabsan ansixintaXeerka ilaalinta iyo maareyntaDeegaanka puntland.

Madaxweynuhu,

Markuuarkay: DastuurkaDawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuuarkay: AnsixintaGolahaWakiilada Puntland eeSummad XGGW/DPLS/87/2017 Garowe,Arbaca. Date:16/o8/2017;

Markuutixgeliyey: Muhiimaddaxeerkani u leeyahayDawladda Puntland.

**<u>Wuxuusoosaaray</u>**

Xeerkansoosocda:

**Qodobka 1-aad**

GolahaWakiiladuwaxay ansixiyeenXeerka ilaalinta iyo maareynta Deegaanka puntland.

**Qodobka 2-aad**

Nuquladaasalka ah (Original) waxaalagu kala keydinayaa XafiiskaMadaxweynaha, XafiiskaXoghayahaGuudee BaarlamaankaiyoXafiiskaGaryaqaankaGuudee DPL.

**Qodobka 3-aad**

DhaqangalkaXeerkaniwuxuunoqonayaamarka Madaxweynuhusaxiixo, lagunasoosaarofaafintarasmiga ah ee DawladdaPuntland..

**Prof Cabdiwelimaxamad Cali Gaas.**
**MadaxweynahaDawladdapuntland.**

*Ref:*-XGGW/DPL/ 87 / 2017 Garoowe, Arbaca Date:- 16/ 08 /2017

Ku:- Madaxweynaha DPL Garoowe

Ujeeddo:- Ansixinta Xeerka ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka Puntland.

Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:-

MARKUU ARKAY: Dastuurka DPL Qodobka 64-[aad] Faqrada 1-[aad].

MARKUU ARKAY: Soo gudbinta Madaxweynaha ee Ref: - **MW/DPS/471/2016 ee December, 11/2016,** kuna saabsan Ansixin Xeer.

MARKUU DHEGEYSTAY: Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey Kalfadhigii 39-aad fadhigiisii 18-aad ee 03/08/2017, Xeerka ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka Puntland.

Wuxuu Guddoomiyey:

Ansixinta Xeerka ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka Puntland.

Guddoomiyaha Golaha Wakiilladda
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

Allaa Mahad Leh

Md. Axmed Cali Xaashi

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

# XEERKA ILAALINTA IYO MAARAYNTA DEEGAANKA PUNTLAND

## *QAYBTA 1-aad*

## HORDHAC

### Qodobka 1-aad

### Magaca iyo Ujeeddada Xeerka

Xeerkan waxa lagu magacaabaa Xeerka ilaalinta iyo Maaraynta Deegaanka Puntland.

### Qodobka 2-aad

### Erey-Bixin

Si loo fahmo macnaha guud ee xeerkan, ereyada soo socda waxay yeelanayaan fasiraadda ku hor qoran:-

**Xeer:** waxa loola jeedaa Xeerka Ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka Puntland.

**Xaabo:** waxaa loola jeeda laamaha iyo jirdaha qalalay ee la shito;

**Daryeel/ilaalin:** waxa loola jeedaa ilaalinta, hagaajinta, soo-nooleynta iyo horumarinta Deegaanka si loo joogteeyo ka faa'ideysigiisa;

**Deegaan:** waxaa laga wadaa wadarta guud ee dhammaan waxyaalaha dabiicga ah, ha noqdeen kuwa xaaladii lagu abuuray ku sugan ama kuwa la dhalan rogay, islamarkaana jiritaankoodu ama baaxadoodu saamayso ladnaanta qofka ama noolaha kale, waxaana soo galaya hawada,dhulka, biyaha, noolaha iyo inta noloshu ka jiri karto.

**Diqowga:** waxaa loola jeedaa wasakhow ka dhasha qashinka iyo walxaha sunta kiimikada iyo dawooyinka sunta ah (bio-chemicals) ee ay keenaan hawlaha ama ficilada bini-aadmigu sameeyo taas oo sababta in sabada-Deegaanku doorsoon ku yimaado, isla markaana raadayn xun ku reebta ladnaanta bulshada, xoolaha, duurjoogta (dhirta & xayawaanka). Diqowga waxa uu kala baxaa:

b) **Diqowga Badda:** waxa loola jeedaa wax kasta oo wasakheeya biyaha badda taas oo doorisa muuqaalka iyo sifaadka loo yiqiin badda, dhallan roga bilicda badda iyo deegaamada ku xeeran, keentana xanuuno ku dhaca noolaha ku nool badda iyo deegaamada u dhow.

t) **Diqowga Hawada:** diqowga hawadu waxa uu ka dhasahaa markii walxo dhibaato leh lagu daadiyo hawada sida, hoorayaasha khatarta ah, walxaha hawada sare heehaaba (particulates) kuwaas oo sababa xanuuno, xasaasiyad ama xitaa dhimasho. Sidoo kale waxyeeleeya noolayaasha kale sida duurjoogta, xoolaha, beeraha iyo Deegaanka guud ahaan.

j) **Diqowga isaga goosha xuduudaha:** Noocaan dikhowga ah waa midka uu dhaliyo hal dal balse kufaafa wadamo kale. Roobka aashitada leh (Acid rain) waa tusaale diqowga xadka dhaafa, waxaana meel walba gaarsiin kara saameyntiisa dabaysha dhacaysa;

**Duur-joog:** waxaa loola jeedaa xayawaanka sida shimbiraha, kaluunka wabiga, xamaaratada, noocyada kala duwan ee ugaarta, oo aanay ku jirin noolaha yar yar ee dhulka;

**Ruqsad:**waxa loola jeedaa ruqsad, oggolaansho, shahaado/caddayn ama ogolaansho rasmi ah oo qoraal ah oo ay bixiso Wasaaradda Deegaanka, Duurjoogta iyo Dalxiiska ama cid kale oo ay u wakiilatay hawshaas;

**Sahminta Saamaynta Deegaanka:** waxaa loola jeedaa baaritaan cilmaysan oo loo sameeyo si loo ogaado in mashruucu saamayn xun ku yeelan karo Deegaanka iyo in kale ka hor intaan mashruuca la fulin;

**Seere/Seerayaal:** waxaa loo la jeeda dhul muddo cayiman loo xayiray/qoondeeyay/ daryeelka dhirta iyo xayawaanka;

**Goleyaasha Degmooyinka:** waxa loola jeedaa goleyaasha degmooyinka ee lagu yagleelay **Xeer Lr 7 / 2003**;

**Qashin:** waxaa loola jeedaa walax kasta oo wasakh ahaan la isaga fogeeyo oo Deegaanka lagu daadiyo si mug ah ama muunad ah , ha ahaado dareere, adke , hoore ama shucaac (radio-active ) kaas oo doorin kara Deegaanka (suuban) ;

**Qof:** waxaa loola jeeda qofka dabiiciga ah (natural person) ee wax dacwayn kara , lana dacwayna karo iyo qofka aan dabiiciga ahayn ee sharcigu qabto (Juridical person ) sida qofka dabiicga ah wax dacwayn kara , lana dacwayn karo sida shirkadaha, hay'adaha dawliga ah iyo kuwa aan dawligahayn ;

**Kormeeraha Deegaanka:** waa sarkaal ay magacaabayso Wasaaraddu si uu u fuliyo hawlaha la xiriira maaraynta Deegaanka loo igmaday;

**Kiimiko ama Sun:** waxaa loola jeedaa walax kasta noocay doonto ha ahaatee oo iskeed sun u ah ama markii walax kale lagu daro sun noqota, ama warshad hasoo saarto ama halaga soo miiro wax dabiici ah, waxaana soo galaya, sida ujeedada xeeerkan tahay, sunta warshadaha, sunta cayayaanka lagu dilo, daawooyinka iyo walxaha wax lagu bacrimiyo;

**Waax:** waxa loola jeedaa Waaxda Maareynta Deegaanka ee lagu dhisay Xeerka Daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka.

**Wasaaradda:** waxaa loola jeedaa Wasaaradda Deegaanka, Duurjoogta iyo Dalxiiska;

**Wasiirka:** Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Deegaanka, Duurjoogta iyo Dalxiiska.

## QAYBTA 2-aad:
## WAAJIBAADKA IYO XUQUUQDA DEEGAANKA

### Qodobka 3-aad
### Xuquuqda Helitaanka Deegaan Nadiif ah oo Caafimaad leh

(1) Qof walba oo ku nool Puntland waxa uu xaq u leeyahay in uu helo deegaan leh nadaafad, nabad iyo caafimaad.

(2) Xuquuqda deegaan nadiif ah, nabad iyo caafimaad leh waxa ku jira xuquuqda ah in la heli karo dhammaan goobaha kala duwan ee dadku u baahan yahay, sida goobo lagu nasto, goobo waxbarasho, xarumo caafimaad, goobo lagu cibaadeysto, goobo ka turjuma dhaqanka iyo hiddaha.

### Qodobka 4-aad
### Xuquuqda Ka-qayb galka Talada

(1) Qof walba oo ku nool Puntland waxa uu xaq u leeyahay in uu ka qayb-galo wada-tashiga guud ee lagu go'aaminayo arrimaha saameynta ku leh Deegaanka.

(2) Marka la eego qodobkaan, "wada-tashiga dadwaynaha" (public consultation) waxa soo hoos galaya la socodsiinta dadwaynaha xogta qorshayaasha iyo go'aan kasta oo saameynta ku leh Deegaanka, si dadku uga talo-bixiyaan qorshayaasha iyo go'aamada Deegaan, isla markaana tixgelin wanaagsan la siiyo talooyinka dadku ku soo gudbiyaan wata-tashiga.

### Qodobka 5-aad
### Xaqa Soo Gudbinta Dacwad Ku Saabsan Deegaanka

(1) Qof kasta oo ku nool Puntland waxa uu xaq u leeyahay in uu dacwad la xiriirta Deegaanka hor keeno maxkamadda awoodda u leh.

(2) Xaqa qofku uu u leeyahay dacwad waxa ka mid ah in dacwadiisa wax laga qabto, isla markaana maxkamaddu dacwadda dhegeysato haddii uu qofku ka cabanayo in lagu sameeyey, ama lagu sameynayo, xad-gudub iyo in la xaqiijiyo xaqa uu u leeyahay Deegaan nadiif ah oo caafimaad qaba.

(3) Maxkamadda waxa suurto-gal ah inay:

b) bixiso amar, ama tilmaamo looga hor-tegi karo, ama lagu joojin karo ficillada waxyeellada ku ah Deegaanka;

t) ku khasabto laamaha dawladda in ay tallaabo ka qaadaan ka-hor tagga ama joojinta waxyaabaha hagardaamada ama dhibta ku ah Deegaanka;

j) Shuruud uga dhigto hawl walba oo Deegaanka laga qabanayo in ay waafaqsan yihiinxeerakan.

x) ku khasabto dadka waxyeellada u geystay Deegaanka in ay u hawl-galaan dib ugu soo celinta Deegaanka xaaladdii uu ku sugnaa ka hor inta aysan waxyeellada u geysan; iyo

kh) In ay amar ku bixiso in dadka waxyeellada Deegaan saamaysay la siiyo magdhow iyo dhaqaale u dhigma khasaaraha soo gaaray.

(4) Xaqa qofku u leeyahay inuu dacwad oogo, ama maxkamad sharci ah ay dhageysato waa in ay noqotaa mid eexasho la'aan ah, madax bannaan awoodna u leh inay dacwadda dhegaysato.

## Qodobka 6-aad
## Waajibka Ilaalinta Deegaanka

(1) Qof walba oo ku nool Puntland iyo hay'ad walba oo dawli ah ama aan dawli ahayn xil iyo mas'uuliyad ayaa ka saaran ilaalinta, daryeelka iyo hagaajinta Deegaanka.

(2) Ilaalinta Deegaanka waxa ka mid ah in mas'uuliyiinta lala socodsiiyo hawlaha ama arrimaha saameynta xun ku yeelan kara Deegaanka.

(3) Qofka ama qaybaha dawliga ah ee qaabbilsan ilaalinta Deegaanka inta ay ku jiraan gudashada xilka loo idmaday ee ilaalinta Deegaanka, waa in ay u hoggaansamaan siyaasadaha iyo shuruucda saldhigga u ah ilaalinta iyo daryeelka Deegaanka.

## Qodobka 7-aad
## Waajibka Dhaqan-gelinta Mabaadii'da Ilaalinta Deegaanka

Garsoorka, wasaaradda iyo qof walba oo fulinaya waajibaad ama dhaqan-gelinaya xeerakan waa in uu raacaa mabaadii'da hoos ku qoran ee horumarinta iyo maareynta Deegaanka-

b) Mabaad'ida Islaamka ee ku aadan ilaalinta Deegaanka iyo ka hortagga kharribaadda Deegaanka (Fasaadka dhulka).

t) Mabda'a Sinnaanta.

j) Mabda'a Taxaddarka (ka fiirsashada).

x) Mabda'a ah "qofkii wasakheeya Deegaanka, waa inuu bixiyaa ama kharash dib ugu celiyaa dib u hagaajinta Deegaanka.

Kh) Mabda'a dhowrista sabo-Deegaanka (ecosystem ).

d) Mabda'a ah in dadka laga qayb-gasho siyaasadaha horumarinta,qorsheyaasha iyo hawlaha lagu daryeelayo Deegaanka iyo

r) Mabda'a ah in hawl walba ay ka horreyso daraasad lagu xaqiijinayo saameynta ay hawshaasi ku yeelan karto Deegaanka.

## QAYBTA 3-aad
## HAY'ADAHA AGAASINKA DEEGAANKA

### Qodobka 8-aad
### Hawlaha iyo Awoodaha Wasaaradda

(1) Madaxweynaha ayaa magacaabaya Wasiir hormuud u noqda daryeelka iyo maareynta Deegaanka.

(2) Wasaaraddu waa inay -

b) Isududaa, una agaasintaa arrimaha Deegaanka heer dawladeed, gobol iyo degmo si hab waara ah oo waafaqsan xeerakan.

t) Cilmi-baaris iyo lafa-gur ku sameysaa daryeelka iyo maareynta Deegaanka, isbeddelka cimilada iyo xiriirka u dhexeeya horumarka dalka, hoos-u-dhigidda saboolnimada, maareynta masiibooyinka iyo gaaritaanka Yoolasha Caalamiga ah ee Horumarinta Waarta (Sustainable Development Goals).

j) Dejisaa, dibna u eegtaa, isna waafajisaa shuruucda iyo qorsheyaasha waaweyn ee jira iyo siyaasadaha u degsan Wasaaradda si u maaraynta Deegaanka hab waara (environmental sustainability) uga mid noqdo qorshaha horumarineed ee Maamulka Puntland iyo heer Federaal.

x) Dejisaa xeer hoosaadyo (regulations), hab-raacyo (guidelines ) iyo halbeegyo wax lagu cabiro (standards) suurta gelisa dhaqan-gelinta xeerakan.

Kh) Samaysaa daraasad lagu ogaado Saameynta iyo Khatarta ka dhalan karta (Risk assessment) ka faa'iidaysiga kheyraadka debiiciga ah.

d) Dejisaa, fulisaana habab baahsan oo la gula soconayo hadba xaaladda uu marayo Deegaanka iyo kheyraadka debiiciga ah.

r) Sare u qaadaa wacyiga iyo aqoonta dadweynaha dhanka maareynta kheyraadka debiiciga ah iyo daryeelka Deegaanka.

s) U ololaysaa yagleelidda ciidan gaar ah oo ilaaliya Deegaanka, fuliyana dhammaan xeerarka daryeelka Deegaanka iyo la dagaalanka xaalufka.

sh) Dhiirigelisaa deegaamada sida gaarka ah uga soo baxa ilaalinta iyo daryeelka Deegaanka iyada oo u fidinaysa taageerada farsamo, agab iyo dhisme ee ay u baahanyihiin.

### Qodobka 9-aad
### Gudoomiyaasha Gobollada

(1) Gudoomiyaasha gobollada ayaa masuul ka ah isku xidhka gobollada iyo degmooyinka arrimaha ee ku aadan ilaalinta Deegaanka.

(2) Gudoomiyaasha gobollada waa in ay u hawl galaan :

b) Isku xirka dawladda iyo gobolka arrimaha daryeelka Deegaanka.

t) Fulinta shuruucda, siyaasadaha iyo qoryashaasha Deegaanka ee heer gobol;

j) La dagaalanka deegaamaynta aan loo meeldayin, gubista dhuxusha,xirmaysiga daaqa iyo ceshiimada.

x) Xalinta khilaafaadka ka dhasha maaraynta Deegaanka iyo wadaagista khayraadka dabiiciga ah.

kh) Hawl-gelinta ciidamo si gaar ah u fuliya xeerka Deegaanka oo ka hawlgala dhamaan degmooyinka iyo tuulooyinka gobollada, iyaga oo la kaashanaya Wasaaradda amniga.

## Qodobka 10-aad
## Goleyaasha Degmooyinka

(1) Degmada ayaa wakiil uga ah dawladda arrimaha la xiriira daadajinta hawlaha daryeelka iyo maaraynta Deegaanka heer degmo iyo heer tuulo.

(2) Goleyaasha Deegaanku waa inay u hawl-galaan:

b) Fulinta shuruucda, siyaasadaha, qorsheyaasha iyo barnaamijyada la xiriira ilaalinta, daryeelka, iyo wanaajinta Deegaanka ee degmooyinkooda.

t) Dejinta qorsheyaal lagu ururinayo laguna maaraynayo qashinka.

j) Samaynta wacyi-gelin ku saabsan ilaalinta iyo daryeelka Deegaanka.

x) Ururinta iyo maaraynta xogta ku saabsan Deegaanka iyo daryeelkiisa.

kh) La socoshada, diyaarinta, dib-u-eegista iyo ogolaanshaha Qiimaynta Sahminta Saamaynta Deegaanka.

d) Qoondaynta qarashaadka lagu yagleelayo beeraha dawladda ee loogu tala galay bilicda iyo nasashada (Public Parks) iyo guud ahaan dhiraynta degmooyinka

r) Dib-u-eegista sharci-hoosaadyada maamulka Deegaanka iyo waaxda gaarka ah hawlaha la xiriira Deegaanka.

s) La wadaagista Gobolka warbixinada ku saabsan hirgelinta xeerakan si ay Wasaaradda ula wadaagto.

sh) Samaynta xeer hoosaadyo lagu dhaqan gelinayo xeerakan.

Dh) Iskaashi la samaynta Golayaasha Horumarinta Tuulooyinka , odayaasha iyo bulshada. iyo

c) Qabashada hawlaha kale ee mararka qaar Wasaaraddu u igmato maamulka degmada ee ku saabsan ilaalinta Deegaanka.

## Qodobka 11-aad
## Guddiyada Horumarinta Tuulooyinka

Goleyaasha Horumarinta Tuuladu, marka loo eego hadba halka ay ka jiraan, waxa ay masuul ka yihiin -

b) maareynta habboon ee Deegaanka ay ka shaqeeyaan;

t) Fulinta dhamaan xeerarka iyo hab raacyada lagu ilaalinayo Deegaanka ee ka soo baxa Wasaaradda, gobolka iyo degmada.

j) Xallinta khilaafka ka dhasha maareynta kheyraadka iyo Deegaanka;

x) Gudashada xilalka iyo hawlaha la xiriira maareynta habboon ee Deegaanka, si waafaqsan qorshayaasha daadajinta daryeelka iyo ilaalinta Deegaanka ee u degsan degmada.

Kh) Kala shaqaynta odayaasha dhaqanka iyo ilaaliyaasha Deegaanka ilaalinta iyo daryeelka Deegaanka.

d) La dagaalanka xaalufka, shidista dhuxusha, xirmaysiga daaqa iyo dhammaan falalka lidka ku ah helitaanka Deegaan fiyaw.

## *QAYBTA 4-aad*

## *ILAALINTA DAAQA, DHIRTA, BIYAHA IYO DUURJOOGTA*

### Qodobka 12-aad

### Seeraynta dhul daaqsimeedka

(1) Wasaaraddu iyada oo la tashaneysa Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka iyo golaha degmooyinka, ayay ku dhawaaqaysaa dhulka inta noqoneysa kayn ama seere dhul-daaqsimeed.

(2) Seeraha la asteeyey waxa uu noqon karaa:

b) Dhul-daaqsin xilliyeed (Seasonal Grazing Reserve): kaas oo ah dhul la seereeyey, oo la xirey, looguna talo-galay in laga faa'ideysto wakhtiyo gaar ah ee sanadka.

t) Dhul-daaqsin meerto ah (Rotational Grazing Reserves): kaas oo ah dhul hadba in gaar ah xooluhu daaqaan.

j) Keydka Abaarta (Famine Reserve): kaas oo ah dhulka qayb loo asteeyay inay xirnaanto muddo dheer, lana furo xilliyada adag ee abaartu jirto oo keliya; iyo

x) Dhulka loo asteeyo cilmi baarista Daraasadda (Study Reserve): kaas oo ah qayb dhulka si joogto ah u xiran, oo loogu talo-galay cilmi-baarista iyo daraasadda dhirta iyo ugaarta.

(3) Isla marka la daabaco axkaamta ku xusan faqrada (1), kaas oo dhulka qaarkiis u astaynaya in uu yahay kayn ama dhul-daaqsimeed, Wasaaraddu waxa ay calaamad muuqata u sameyneysaa bedka uu ku fadhiyo dhulkaas.

(4) Ka hor inta aan amar laga soo saarin faqrada (1), Wasaaradda ama cidda kale ee mas'uuliyadda haysa:

b) Waxa ay ku bixineysaa ogeysiin qoraal ah muddo 30 casho gudohood ah, taas oo tilmaameysa in dhulka qaybta laga hadlayo loo asteeyey dhul-daaqsimeed ama kayn.

t) Qoraalka ogeysiintu waxa uu tilmaan ka bixinayaa xadka dhulka loo asteeyey xirmada.

j) Qoraalka waxa lagu daabacayaa Faafinta Rasmiga ah, waxana la geynayaa xafiisyada Guddoomiyaha Gobolka iyo Duqa Degmada ee dhulka la seereeyey hoos yimaado maamul ahaan, iyada oo ogaysiinta loo faafinayo siyaabaha kale ee dhaqanka u ah dadka ku nool Deegaankaas.

x) Wasaaraddu waa in ay tixgelisaa ra'yiga iyo danaha odayaasha dhaqanka iyo xoolo-dhaqatada ku nool dhulka la xirmeeyey, ka hor inta aan lagu dhawaaqin xirmaynta ama seeraynta.

## Qodobka 13-aad
## Maaraynta iyo Ilaalinta Seerayaasha

1. waxaa mamnuuc ah in la:-

(b) Gooyo, rido, qaato, gubo, dhaawaco, khayraadka dhirta si uu uga ganacsado gaar ahaan dhuxusha ama.
(t) Xagaafo, qoto, beer ahaan u isticmaala iyo wixii lamid ah ama.
(j) Dhisto, ku ganacsada isaga oo aasaasaya tuulooyin ama meel la dago ama.
(x) Oodo, ka qodo ceel biyood ama barkad ama.
(kh) Ka ugaarsada, dabin u dhiga Duur-joogta ku nool seeraha ama.
(d) Waxyeela, riixa, bedela, wareejiya, dhaqaajiya, faragalin ku sameeya caalamadaha seeraha ama.
(r) Ka sameeya wadooyin seeraha gudihiisa ama.
(s) Ka-ganacsada khayraadka dhirta.
(sh) Daajiyo xoolo, la gooyo, ama lagubo cawska seeraha.
Wuxuu galayaa fal-denbiyeed.
2. Qof kasta oo gala denbi ka mid ah denbiya ku xusan faqradda (1) waxa uu mutaysaneyaa ciqaab xabsi ah oo u dhexaysa lix bilood ilaa laba sanno ama ganaax lacageed oo u dhexeeya laba milyan ilaa toban milyan sh.So.

## Qodobka 14-aad
## Kala Xadaynta Dhulka Daaqa iyo Dhul-beereedka

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashaynaysa hay'adaha ay khusayso, waa in ay kala xadaysaa dhulka, iayadoo astaynaysa:-
   - b. Dhulka daaqa.
   - t. Dhulka loo isticmaalo beerida calafka xoolaha (fodder production).
   - j. Dhulka loo asteeyay beeraha.
   - x. Dhulka loo asteeyay xoolo dhaqatada.
   - Kh. Dhulka loo qoondeeyay biyo xireenada (xurfooyinka iyo baliyada).
   - d. Dhulka loo qoondeeyay Cilmi-baarista, kaymaha iyo xayawaanka iyo deegaamaysiga.

2. Wasaaraddu si ay u astayso Dhulka Daaqa, Kaymaha, Duurjoogta iyo khayraadka biyaha loogana faa'idaysto biyaha, waa inay qaaddaa talaabooyinka hoos ku qoran, iyadoo la tashanaysa hay'adaha ay khusayso:-
   - b. Ilaalinta qorarka dooxyada, jeex-jeexa ah ee ka baxsan dhulka beeraha.
   - t. Hirgelinta mashaariic lagu joojinayo carro -guurka.

j. Horumarinta daaqa ku yaala dhulka Puntland hab waara
x. Meelo lagu kobciyo geedaha iyo dhirta.
Kh. Sahaminta dhirta iyo ururinta geedaha nafaqada iyo dawada leh (Biomedicine).
d. Qaadista tiro koob xoolo dhaqato, xoolo u kala haboonista dhulka, xagga beeraha, daaqa dhirta, iyo cilmi baarista.
r. Dhiiri galinta iyo cilmi baarista agabyada iyo farsamooyinka bedeli kara dhuxusha iyo xaabada (alternative sources of energy).

## Qodobka 15-aad
## Ilaalinta iyo isticmaalka Dhirta iyo Dhul Daaqsimeedka

(1) Lama goyn karo, gubi karo, xididada looma saari karo,si khaldanna looma isticmaali karo dhirta Puntland.
(2) Waa mamnuuc in dhirta noocyadeeda kala duwan sida geedaha iyo cawska la baabi'iyo iyadoo la goynayo si looga baayacmushtaro.
(3) Waxaa la ogol yahay in dhirta, miraha, cawska iyo khayraadka kale ee dabiiciga ah looga faa'iidaysto si waafaqsan xeerkan oo aan waxba u dhimayn bid-qabka dhirta.
(4) Qof kasta oo si ulakac ah u gooya, u guba, u rujiya, ama u qalajiya geed ama caws waxaa uu galayaa dembi ciqaabkiisu dhanyahay xabsi u dhexeeya lix bilood ilaa hal sanno ama ganaax udhexeeya laba milyan Sh.So ilaa Shan millyan ama labadaba.
(5) Waxaa laga soo reebayaa ciqaabka fal dembiyeedka ku xusan faqradda (1), qofkii geedka laamihiisa u goosta baahi uu uga maarmi waayay ama dhirta iyo cawska ka jarta beer uu tabcaday oo Wasaaraddu xaqiijisay in aanay ahayn nooca lagu mamnuucay qodobka **22-aad** ee xaarakan.
(6) Ma bannaana in qofku dhirta ka jaro gunta marka uu baahi macquula ugu baahdo, qofkii sidaas sameeyana waxa uu gelayaa denbiga ku xusan faqradda **4-aad.**

## Qodobka 16-aad
## Adeegsiga iyo ka Ganacsiga Bacaha

(1) Qof kasta oo soo dajiya, soo saara , ka ganacsada, kaydiya ama gaadiidkiisa ku rara bacaha wax lagu qaato waxa uu galayaa denbi ciqaabtiisu tahay xabsi u dhexeeya lix bilood ilaa hal sanno ama ganaax u dhexeeya shan milyan ilaa sagaal milyan ama labada oo wada socda .
(2) Bacaha lagu mannuucay faqradda (1) masoo galayaan bacaha alaabooyinka ama bedeecadaha lagu keeno (ku sajalaataysan) (purview plastic bags that are indispensible parts of packaging materials).
(3) Ciqaabka faqradda (1) waa la siyaadin karaa haddii denbiga cidda gashay ay tahay shirkad ganacsi ama masuuliyiin dawladeed.

## Qodobka 17-aad
## Wadooyinka Wararacada/ Qardajeexa ee baabuurtu ku kharribto dhul Daaqsimeedka

(1) Waxaa reeban in baabuurta la mariyo ama waddo baabuur oo cusub laga jeexo dhulka dooxooyinka, balliyada, kobaha iyo meel kasta oo ku habboon daaqa xoolaha.

(2) Qof kasta oo jabiya axkaamta ku xusan faqrada (1) waxa u galayaa denbi ciqaabtiisu tahay hal sanno ilaa saddex sanno oo xarig ah iyo ganaax gaaraya Shan milyan ilaa toban iyo laba milyan sh.So.

(3) Ilaaliyaasha Deegaanka iyo bulshadu waxa ay xirayaan waddo kasta oo wararaco ah oo khatar ku keeni karta Deegaanka iyo daaqa xoolaha.

(4) Ciqaabka ku xusan faqradda (2) waa la siyaadinayaa haddii denbiga uu galo sargaal dawladeed ama hay'ad samafal ama hurumarineed.

## Qodobka 18-aad
## Mamnuucista Shidista, ka ganacsiga iyo raridda Dhuxusha

(1) Qofka dhuxul ka guba geed qoyan waxa uu galaya dembi, waxaana lagu xukumayaa xabsi u dhexeeya laba sanno ilaa Shan sanno iyo ganaax u dhexeeya toban milyan ilaa labaatan milyan Sh.So.

(2) Qof kasta oo ka ganacsada dhuxusha waxa lagu xukumayaa ciqaab xarig ah oo u dhexeeya saddex sanno ilaa Shan sanno iyo ganaax u dhexeeya toban milyan ilaa labaatan milyan Sh.So.

(3) Qof kasta oo gaadiidkiisa ama gaadiidka uu wado ku rara dhuxul waxa lagu xukumayaa ciqaab xarig ah oo u dhexeeya hal sanno ilaa saddex sanno iyo ganaax u dhexeeya todoba milyan ilaa Shan iyo toban milyan Sh. So.

(4) Qofka kasta oo u adeegsada walxo ama kiimikooyin keeni kara in dhirtu qallasho si uu uga sameeyo xaabo, dhuxul, alwaax, tiir ama udbo waxaa lagu qaadayaa ciqaab xarig ah oo u dhexeeya saddex sanno ilaa shan sanno iyo ganaax u dhexeeya toban milyan ilaa labaatan milyan Sh.So.

(5) Qofka gala dembiyada ku xusan faqradaha (1) iyo (4) waxaa lagala wareegayaa wixii gaadiid, qalab iyo xayawaan ah ee uu adeegsadey fal-dembiyeedka.

(6) Hantida, qalabka iyo gaadiidka lala wareego ee ku xusan faqaradda (5) waxa ay noqonayaan hanti qaran ama dawladeed.

(7) Dhammaan dhuxusha ku xusan faqradaha (1), (2) iyo xaabada ku xusan faqradda (4) waa in dawladdu la wareegtaa marka ay qabato,iyada oo laga soo qaadayo hanti dawladeed.

(8) Lawareegista ku xusan faqradda (7) waxa ay ku bedeli karaan hay'adaha fulinaya xeerakan gubista dhuxusha, xaabada iyo agabka kale ee ay qabtaan haddii markaas lawareegistu aanay suurta gal ahayn.

**Qodobka 19-aad**
**Mamnuucista Soo Gelinta iyo Beerista Dhirta Qalaad**

(1) Waxaa reeban in la ogolaado keenista iyo beerista noocyada dhirta qalaad ilaa qiimayn Deegaan lagu sameeyo oo tilmaamaysa in aanu wax dhib ah ku keenayn dhirta dalka ka baxda, biyaha, Deegaankaiyo caafimaadka dadka iyo xoolaha, ogolaanshona laga haysan wasaaradda ama Hay'adda ay qusayso.
(2) Wasaaraddu, iyada oo la kaashanaysa xarun cilmi baaris ama waxbarasho, waa in ay soo saartaa liiska noocyada dhirta khatarta ku ah Deegaanka kuwaas ay reebban tahay in dalka lasoo gasho.
(3) Wasaaraddu, waa in ay diyaarisaa qorshe wax looga qabanayo dhirta qalaad ee horay dalka loogu beeray ama ka baxday oo xadgudubka ku ah xeerakan.
(4) Qof kasta oo jabiya axkaamta qodobkaan wuxuu galayaa denbi ciqaabtiisu tahay xabsi udhexeeya hal sanno ilaa saddex sanno iyo ganaax lacageed oo aan ka yarayn toban milyan Sh. So.

**Qodobka 20-aad**
**Mamnuucista kaamamka ama Xeryaha laga yagleelo dhul-daaqsimeedka**

(1) Waxaa reeban in kaam ama xero laga dhextaago goobaha xoolo daaqeenka ah.
(2) Qof kasta oo jabiya axkaamta faqrada (1) waxa uu galayaa dembi ciqaabtiisu dhan tahay xarig u dhexeeya lix bilood ilaa hal sanno ama ganaax aan ka yarayn Shan milyan Sh.So ama labada oo wada socda.
(3) Haddii qofka galay denbiga ku xusan faqrada (1) uu yahay qof ku cusub deeganada Puntland waxaa la siin karaa digniin uu kaga guuro goobta daaqsinta ah ee uu sida khaladka ah u degay.
(4) Isla ciqaabka ku xusan faqrada (2) waxaa lagu qaadayaa qofkii ku rakiba dul daaqsimeedka Tuyuubka biyaha lagu kaydiyo haddii uu dan ganacsi ka leeyahay iyo mid shakhsi ah intaba.

**Qodobka 21-aad**
**Mamnuucista Cishiimada iyo Gubista Xeryaha**

1. Waxaa reebban in si kas ah loo gubo xero iyadoo looga golleeyahay cishiimo daaq ama biyo ama si kale oo kasta oo xaasidnimo iyo xilkasnimo ah.
2. Waxaa reebban nooc walba oo cishiimo ah haddii ay ahaan lahayd mid loo sameeyo ujeeddo daaq, mid biyood iyo mid xero ah.
3. Qofka gala denbiyada ku xusan faqradaha (1) iyo (2) waxa lagu ciqaabayaa xabsi u dhexeeya lix bilood ilaa toban iyo laba bilood ama ganaax dhan laba milyan ilaa sideed milyan sh.so ama labada oo wada socda.

**Qodobka 22-aad**

**Xirmaysiga Daaqa ee gaarka ah**

(1) Waxa reeban in si gaar ah loo ooto (loo xirmaysto) dhul-daaqsimeed.

(2) Lama bixin karo Ruqsad ogolaanshiiyo ah oo ku aadan oodashada dhul-daaqsimeedka.

(3) Waxa reeban in si gaar ahaaneed loo ooto dhul-cawseedka, dhulka kaymaha, balliyada, kobaha iyo dhulka biya qabatinka leh.

(4) Wasaaraddu iyadoo la tashanaysa guddiyada Deegaanka iyo maamulada gobollada, degmooyinka iyo tuulooyinka, waa inay baabi'isaa dhulka sida sharci darada ah loo ootay, kaas oo aan waafaqsanayn qodobkan faqradiisa (1).

(5) Qof walba oo u xirmaysta goob daaq-simeed si uu caws uga gurto ama ceshiimo uga dhigto, waxa uu galayaa dembi ciqaabtiisu tahay xabsi u dhexeeya laba sanno ilaa Shan sanno iyo ganaax udhexeeya Shan milyan ilaa toban milyan Sh.Som.

(6) Xirmaysiga ku xusan faqrada (1) masoo galayaan ciddii goob aan daaqsin lahayn ku tabacda ama noolaysa.

**Qodobka 23-aad**

**Ka qodista barkadaha Dhul Daaqsimeedka iyo Goobaha Biya Qabatinka**

(1) Waxaa reeban in barkad laga qodo dhulka xoolo daaqeenka ah dhexdeeda iyo goobaha biyaha roobku qabto.

(2) Qof kasta oo jabiya axkaamta ku xusan faqrada (1) waxa uu galayaa dembi ciqaabtiisu dhantahay xarig u dhexeeya hal sanno ilaa saddex sanno ama ganaax aan ka badnayn labaatan milyan Sh.So.

(3) Waxaa soo hoos galaya baraakaha ah lagu mamnuucay faqradda (1), kuwa loo qodo danta guud.

(4) Maxkamadda ama ciddii kale ee fulinaysa xeerakan waxa ay amri kartaa qofka gala denbiga ku xusan faqrada (1) in ay sidii hore ku soo ceshaan goobaha ay qodeen ama dhawaaca u gaysteen.

**Qodobka 24-aad**

**Ilaalinta Baraha Biyaha**

(1) Goobaha laga dhaamiyo biyaha dadku isticmaalo waxa loo ilaalinayaa siyaabaha soo socda:

b. waa in xayndaab lagu wareejiyaa bedka ay ku fadhiyaan biyuhu.

t. waa in biyaha laga ilaaliyaa qashinka iyo dikhowga ka dhasha sunta xoolaha, bacrimiyeyaasha beeraha , iyo waxyaabaha kale ee wasakh dhalin kara.

j. waa in aanay noqon balliyada biyaha iyo xurfooyinka kuwa gaar loo leeyahay ama laga ganacsado.

x. waa in la daryeelaa dhirta ka baxda agagaarka goobaha biyaha;

kh. waxa laga hor-tagayaa nidaam-darrada, dagaalka ama wax walba oo carqalad ku keeni kara dadka biyaha u soo doonta balliyada ama xurfooyinka.

d. Waa in la mamnuucaa in goobaha biyaha laga dhaansado iyo nawaaxigooda lagu qubo wax qashin ah, noocuu doono ha noqdee.

(2) Isticmaalka iyo maamulka biyaha waa in aan looga faa'iidaysan qaab aan caddaalad ahayn oo dhiig-miirasho ah, taas oo keeni karta nabaad-guur iyo khilaaf.

(3) Qof walba oo jebiya qodobkaan waxa uu galay fal denbiyeed, waxaana lagu xukumayaa ciqaab xarig ah oo u dhexaysa lix bilood ilaa laba sanno iyo ganaax lacageed oo u dhigma dhibaatada Deegaan iyo bulsho ee falku sababay.

(4) Hadii fal denbiyeedku uu khasaare ama dhaawac u gaysto qof kale waxa lagu xukumayaa in uu siiyo cidii uu dhaawaca ama khasaaraha gaarsiiyay magdhaw u dhigma dhawaaca ama khasaaraha uu gaystay.

## Qodobka 25-aad
## Laynta , Dhaawicista iyo ka Ganacsiga Duurjoogta

(1) Waxaa reeban dilka, dhaawicista, qabsahsdada iyo ka gancisga duurjoogta nooc kasta oo ay tahay.

(2) Qofkasta oo gala denbiga ku xusan faqrada (1) waxa uu mutaysanayaa ciqaab xabsi oo udhexaysa lix bilood ilaa hal sanno ama ganaax u dhexeeya laba milyan ilaa toban iyo Shanmilyan Sh.So.

(3) Ciqaabka ku xusan faqrada (2) waxa lagu qaadayaa qofkasta oo ku andacooda in uu u dishay duurjoog ujeeddo caafimaad, cunto amadhaqan dhaqaale.

(4) Waxaa laga soo reebayaa axkaamta ku xusan faqradda (1) haddii qof ogolaansho ka haysta Wasaaradda uu usoo qabto duurjoogta sababo cilmi baaris ama in uu ku xannaaneeyo goob xafidan oo aan ka baxsanayn Deegaanada Puntland.

(5) Waxaa laga soo reebayaa axkaamta ku xusan qodobkaan haddii qofku xayawaanka u dilay ama u dhaawacay isaga oo ka difaacaya naftiisa ama naf kale, hantidiisa ama hanti kale.

## QAYBTA 5-aad
## KA HOR-TAGIDDA IYO XAKAMAYNTA DIQOW (POLLUTION)

## Qodobka 26-aad
## Mamnuucidda Guud ee Diqowga

(1) Qof kasta oo dikhaw u gaysta ama u fasaxa qof kale in uu dikhaw u gaysto Deegaanka qaab xad-gudub ku ah Xeerkan ama xeerarka kale ee u degsan Deegaanka, waxa uu galayaa dembi.

(2) Marka la go'aaminayo in la siiyo ruqsad ama cid loo oggolaanayo in ay qashin ku shubto Deegaanka ama dikhaw kusii dayso , iyo shuruudaha loogu oggolaan karo,

golaha degmadu ama cidda kale ee qaabbilsan hawshan waa in ay hubisaa in hawsha loo qabto habka ugu habboon ee ugu macquulsan.

(3) "Qaabka ugu habboon ee ugu macquulsan" marka laga hadlo qaadidda qashinka ama sii deynta sawaxanka (jabaqda weyn), waxa loola jeedaa qaabka ugu habboon ee looga hor-tagi karo ama hoos loogu dhigi karo saameynta xun ee ku imaanaysa caafimaadka aadanaha, nolosha ama Deegaanka, iyada oo maskaxda lagu hayo qiimaha ay hawshu ku kaceyso marka la eego duruufaha ka jira Puntland iyo wixii khatar ah ee la xiriirta qaabka la adeegsanayo.

(4) Qofna kuma daadin karo sun sababi karta in hawadu sumowda, taas oo lid ku ah Xeerkan.

(5) Qofna ma sii deyn karo, ama ma sababi karo in la sii daayo, sawaxan dhaafsiisan heerka la oggol yahay sida ku xusan halbeegyada lagu cabiro jabaqda ee Wasaaraddu dejisay.

(6) Qofka daadiya walxo sun ah ama fura sawaxan isaga oo isaga indhatiraya qaababka habboon ee ku xusan nidaamka wasaaraddu dejisay waxa uu galayaa denbi.

## Qodobka 27-aad
## Ka-Hortagga iyo Xakameynta Isku-Dhafan ee Dikhawga

Wasaaraddu, si ka-hortag iyo xakameyn dhameystiran loogu sameeyo wasakhda, waxa ay bixinaysaa tilmaamo hagaya hababka ugu macquulsan ee looga hor-tegi karo ama hoos loogu dhigi karo saameynta aan fiicnayn ee ku iman karta Deegaanka, sida:-

(b) Nooca qashinka iyo sida uu Deegaanku ugu nugul yahay saameynta uu leeyahay qashinkaas;

(t) Saameynta dhaqaale, iyo saameynta gaarka ah ee hab walba uu ku yeelan karo Deegaanka; iyo

(j) Heerka aqoonta farsamo iyo in habka la raacay si wanaagsan loo dabbaqi karo.

## Qodobka 28-aad
## Waajibaadka La-Jaan Qaadidda Isbeddellada Farsamada Casriga (Teknolojiyada)

(1) Wasaaraddu waa in ay, iyada oo la kaashanaysa hay'adaha kale ee ay khusayso, ka hortagtaa ama yaraysaa raadadka ka dhasha sumaha wasakhda ah ee ka dhasha adeegsiga farsamooyinka casriga ah (tiknoloojiyadda).

(2) Qof kasta oo fulinaya hawl saamayn ku leh Deegaanka waxa laga doonayaa in uu raaco amarka ay Wasaaraddu ka soo saarto habka adeegsiga (dabbaqidda) horumarka teknoolojiyadda si looga hor-tago ama hoos loogu dhigo wasakhaynta Deegaanka.

**Qodobka 29-aad**

**Waajibaadka shaacinta Macluumaadka (xogta) si looga Hortago Diqawga**

Iyadoo ujeedku yahay fududaynta ka hor-tegista iyo wax ka qabashada diqowga, Wasaaraddu waxa ay soo saari kartaa shuruuc waajibinaysa in uu xog soo gudbiyo-:

(b) qofka leh ama ka shaqeeya mashruuc waraab, qashin gurid, warshad wax soo saarta, warshad lagu nadiifiyo qashinka, goob lagu daadiyo qashinka adkaha, goob ganacsi ama lagu keydiyo shidaalka, geerash iyo meel walba oo shaqada ka socota uu ka soo baxo qashin dareere ah, ama wasakh kale oo Deegaanka soo gaarta; ama

(t) Hay'ad walba oo waajib sharci loogu leeyahay inay diqawga ama wasakhda ka ilaaliso agagaarka ay masuulka ka tahay.

**Qodobka 30-aad**

**Ogaysiinta Joojinta Hawl la Oggolaaday**

(1) Haddii Wasaaraddu u aragto in hawl sii wadiddeedu ay khatar weyn ku tahay Deegaanka, waa in ay siisaa cidda hawsha wada ogeysiin ay ku joojineyso hawsha.

(2) Ogeysiintan joojinta ah ee ku xusan faqradda (1) waa inay –

b. Qeexdaa khatarta hawshu ay ku hayso Deegaanka;

t. qeexdaa tallaabooyinka loo baahan yahay in hawsha laga qabto, iyo muddada ay tallaabooyinkaas qaadanayaan;

j. amar ku bixinaysaa in aan la oggoleyn in hawshu dib u billaabato illaa oggolaansho ay heleyso; iyo

x. Halka ay khuseyso, in hawsha qaybteed oo keliya lagu xiro shuruudo, oo hawsha la sii wado marka laga reebo inta la joojiyey.

**Qodobka 31-aad**

**Ruqsadaha la Xiriira Maareynta Diqawga**

(1) Waaxda Wasaaradda u qaabilsan Daraasadda Sahminta Saameynta Deegaanka ayaa bixinaysa ruqsada la xiriirta wax-ka-qabashada diqawga

(2) Waaxdu waa inay—

b. tix-gelin siiso dadka soo codsanaya ruqsadaha hawlaha la xiriira maareynta diqawga;

t. bixiso ruqsadaha maareynta diqawga hab waafaqsan xeerakan iyo xeerarka kale la jaanqaadaya ;

(3) Waa in aan Qofna ku lug yeelan hawl wasakhayn karta hawada, biyaha ama dhulka in ka badan heerka la oggol yahay ama sida ku xusan Xeerkan, iyo sida waafaqsan ruqsada maareynta diqawga.

(4) Waaxdu ma bixin karto ruqso illaa la hubsado cidda la siinayo ruqsadda in ay awood u leedahay mag-dhowga dhibbanayaasha waxyeelladu ka soo gaari karto diqowga iyo weliba nadiifinta Deegaanka hab waafaqsan mabda'a ah in "qof walba uu hagaajiyo wixii uu Deegaanka ka bi'iyey".

## Qodobka 32-aad
## Codsiga Ruqsada Diqawga

(1) Waaxda waxa loo soo gudbinayaa codsi sheegaya in hawsha la qabayano ay ka dhalaneyso dikhaw saameeya dhulka, biyaha ama hawada xad ka badan inta caadiga ah ama inta ku qeexan Xeerkan.

(2) Khidmadaha ruqsadaha iyo cusboonaysiinta diqowga waxaa lagu jaangoynayaa xeer golayaashu ansixiyaan.

(3) Waaxda cid kale siin meyso xogta loo soo gudbiyey ee ku saabsan milkiilaha.

## Qodobka 33-aad
## Tixgelinta Codsiga

(1) Marka codsigu soo gaaro, Waaxdu waa inay—

b. 30 maalmood gudahood ku war-gelisaa dadka hawshu qusayso ;
t. waxa ay tix-gelin siineysaa wakiillada ka socda waaxaha Dawladda;
j. waxa ay tix-gelin siineysaa codsiga iyada oo qiimeyneysa dhamaan wakiillada;
x. Oggolaaneysaa ama diideysaa codsiga.

(2) Waaxdu waxa suurto-gal ah, ka hor inta aysan bixin ama diidin codsi sida ku xusan faqrada (1)—

b. inay dalbato in la sameeyo daraasad lagu baarayo saameynta Deegaan ee hawshu ku yeelan karto Deegaanka si waafaqsan Xeerka Daraasadda Sahminta Saameynta Deegaanka (Environmental Impact Assessment Act) haddii ay muuqato in aan laga fursan Karin samaynta daraasadaas marka la eego nooca hawsha la codsaday iyo dikhawga ka dhalan kara ;
t. In ay ka dalbato codsadaha in uu xog dheeraad ah ka soo gudbiyo goobta uu hawsha ka fulinayo, qalabka ama agabka uu adeegsanayo iyo naqshadda farsamo (technology design) ee uu adeegsanayo.

(3) Haddii Waaxdu diiddo codsi loo soo gudbiyey, waa in ay qoraal ahaan ku sheegto sababaha ay u cuskanayaan diidmada.

**Qodobka 34-aad**
**Shuruudaha la socda Ruqsadda Diqawga**

(1) Ruqsadda lagu baxsho hab waafaqsan xeerakan waa in hab qoraal ah loo baxshaa, ayna yeelataa shuruudo la socda oo ku xusan ruqsadda.
(2) Ruqsada lagu baxsho hab waafaqsan xeerakan waa mid waqti cayiman ku eg, lana cusboonaynsiin karo.

**Qodobka 35-aad**
**Khidmadda Ruqsadda**

(1) Ruqsad kasta, mid cusub iyo mid la cusbooneysiinayoba, sida ku xusan qodobka (34), Waaxdu waxa ay ka qaadaysaa cidda loo sharciyeynayo khidmad go'an.
(2) Khidmadda la qaadayo sida ku xusan faqradda (1) waxa ay ku saleysan tahay mabda'a ah " Hadba inta qofku Deegaanka diqaw u gaysto ayuu bixinayaa oo kharash ah" (Polluter pay princible ) sidaa darteedna—
   b. qofka dhaliya diqawga ugu badan, ayaa la saarayaa culeyska ugu badan ee lagu nadiifinayo Deegaanka;
   t. Lacagta khidmadda waxa loo isticmaalayaa in lagu dhiirigeliyo hab dhaqan lagu dhowrayo Deegaanka, iyada oo khidmad aad u yar laga qaadayo hawlaha aan dikhawga badan gaarsiineyn Deegaanka.

**Qodobka 36-aad**
**Cusbooneysiinta Ruqsada Diqawga**

(1) Cidda ruqsada la siiyey waxa ay Waaxda ka codsan kartaa in loo cusbooneysiiyo ruqsada si waafaqsan xeeraka.
(2) Waaxdu waxa ay tix-gelineysaa codsi walba oo lagu dalbanayo cusbooneysiin muddo saddex bilood ah.
(3) Waaxdu waxa ay—

   b. oggolaan kartaa codsiga cusbooneysiinta ruqsada;
   t. diidi kartaa codsiga;
   j. codsan kartaa xog dheeraad ah.

(4) Marka la gaarayo go'aanka ku xusan faqradda (3), Waaxdu waa inay tix-gelin siisaa arrimaha soo socda—

   b) haddii codsaduhu u hoggaansamay shuruudihii ku qeexnaa ruqsadii hore;
   t) haddii codsaduhu ku dadaalay in uu hoos u dhigo diqawga ;
   j) saameynta diqawga Deegaanka lagu sii daayay yeelan karo ;
   x) wixii kale ee Waaxdu u aragto in ay mudan tahay tix-gelin.

**Qodobka 37-aad**
**La-noqoshada Ruqsada Diqawga**

Waaxdu, waxa ay kula noqon kartaa hab qoraal ah, ruqsada hawlaha dikhawga uu ka dhalasho haddii:-

b) cidda ruqsada la siiyey ay ku xad-gudubto axkaamta Xeerakan ama xeerarka kale ee hoos yimaada;
t) cidda ruqsada la siiyey kari weydo inay u hoggaansanto shuruudaha ku qeexan ruqsada;
j) waaxdu u aragto arrintaa in ay dan ugu jirto Deegaanka ama dadka.

**Qodobka 38-aad**
**Diiwaan-gelinta Ruqsada Diqawga**

(1) Wasaaraddu waa inay haysaa diiwaanka dhamaan ruqsadaha lagu soo saaray si waafaqsan hagayaasha ku xusan xeerakan.
(2) Diiwaanku waa in uu noqdaa dokumeenti dadku wada arki karo goor walba oo ay u baahdaan, una furan qof walba.

**Qodobka 39-aad**
**Ciqaabta Denbiyada la xiriira qaybta 5aad**

(1) Qof kasta oo gala denbi ka mida denbiya ku xusan qodobka 28-aad ilaa 33 aad waxa lagu ciqaabayaa xabsi udhexeeya hal sanno ilaa Shan sanno iyo ganaax u dhexeeya toban milyan ilaa sagaanshan milyan sho.So.
(2) Ciqaabta ku qeexan faqradda (1) waxa dheeraad ku ah iyada oo qofka dembiilaha ahi ay maxkamaddu ku xukumi karto-
   b) in uu bixiyo kharashka ay dawladdu wax uga qabaneyso khasaaraha ama waxyeellada ka dhalatay dikhawga uu sii daayay ; iyo
   t) In uu mag-dhow siiyo cid kasta oo waxyeello ka soo gaartay, taas oo noqon karta dayactir, hagaajin, ama mag-dhow le'eg hadba inta maxkamaddu go'aamiso.

## *QAYBTA 6aad: MAAREYNTA QASHINKA*

### *Cutubka 1aad: Qashinka Adkaha ah*

**Qodobka 40-aad**
**Xilka Goleyaasha Deegaanka ka saaran Maareynta iyo Yareynta Qashinka Adkaha ah**

(1) Golayaasha degmooyinku, si uu u yareeyo qashinka adkaha ah ee ka soo baxa Deegaanada uu ka hawl-galo, waa inay soo saaraan:

b) Shuruudaha looga baahanyahay noocyada kala duwan ee qashinka isku meel lagu qubi karin ama in qashinka la kala saaro ka hor inta aan la qaadin;

t) halbeegyo hagaya nooca , cabbirka iyo astaamaha agabka ama qalabka qashinka lagu shubayo ama loo isticmaalayo; iyo

j) Hannaan looga qayb geliyo hay'adaha gaarka loo leeyahay iyo ururada aan dawliga ahayn qorsheynta, wacyi-gelinta la siinayo dadka ka shaqeeya wax-soo-saarka, iibka, gaadiidleyda iyo kuwa kale, wacyi-gelintaas oo ku saabsan baahida loo qabo haamo ku habboon qashinka, iyo weliba in qashinka la kala sooco ka hor inta aan la qaadin.

(2) Goleyaasha degmooyinku, marka la eego baaxadda dhulka ay ka shaqeeyaan, waa in ay:-

b) amraan in Daraasadda Sahminta Saameynta Deegaankalagu sameeyo dhamaan hawlaha waaweyn si qashinka adkaha ah si wanaagsan loogu maareeyo;

t) xaqijiyaan in loo maareeyo qashinka adkaha ah si waafaqsan qorsheyaasha horumarineed ee goleyaasha degmooyinka ay dejiyaan; iyo

j) Hubiyaan in qashinka la kala saaro inta aan gaadiidka la saarin, qaab waafaqsan hal-beegyada uu u dejiyo golaha Deegaanku.

(3) Marka la doonayo in go'aan laga gaaro qaabka ugu habboon ee loo ururinayo, loola tacaalayo ama loo qubayo qashinka adkaha ah, maamulka dawladda hoose daraasad ayuu ka sameynayaa baaxadda dhulka hoos yimaada.

## Qodobka 41-aad

## Ka-Ururinta qashinka adkaha ah ee guryaha, Suuqyada, Goobaha Ganacsiga iyo Hay'adaha kale

(1) Gole degmo kasta waa in uu sameeyaa daraasado joogto ah si uu u ogaado nooca wasakhda adkaha ah ee ka dhasha suuqyada, goobaha ganacsiga iyo hay'adaha, waana in uu jaangooyaa qaabka ugu habboon ee loo kala soocayo, loo keydinayo, ama loo fogeyn karo qashinkaas.

(2) Marka la jaangoynayo qaabka habboon ee loo keydin karo, ama loo fogeyn karo qashinka adkaha ah ee ka dhasha suuqyada kala duwan, goobaha ganacsiga ama hay'adaha ku sugan dhulka hoos yimaada, golaha Deegaanku waxa uu hubinayaa in qashinka adkaha ah la kala saaro, si habboon loo keydiyo ayada oo loo eegayo hadba asalka uu ka soo jeedo qashinku noole (organic), caag (plastic), quraarad ama bir.

(3) Wasaaraddu waxa ay soo saari kartaa nidaam heer Puntland ah oo lagu kala soocayo qashinka adkaha ah, nidaamkaas oo ay goleyaasha Deegaanku ka dhaqan-gelinayaan dhulka ay ka shaqeeyaan ee hoos yimaada maamulkooda.

(4) Marka la eego ujeedada qodobkaan "hay'ad" (institution) waxa soo galaya dugsiyada waxbarasho, xafiisyada, cisbitaallada, booliiska, xeryaha ciidamada, kaamamka iyo ururrada kale kuwaas oo Wasaaraddu u garato in ay yihiin hay'ado marka laga hadlayo maareynta qashinka adkaha ah.

## Qodobka 42-aad
## Maareynta Qashinka Adkaha ah ee ka Dhasha Warshadaha

(1) Golayaasha Degmadu waa in ay hubiyaan in warshadaha ku yaal Deegaannada hoos yimaada in ay leeyihiin ama diyaarsadeen agab iyo bed ku filan maareynta dhamaan qashinka ka soo baxa warshadaha, ka hor inta aan loo rarin meelaha loogu talo-galey.

(2) Golayaasha degmadu waa in ay hubiyaan in haamaha qashinka ama goobaha ay warshaduhu u asteeyeen qashinka adkaha ah in ay yihiin nadiif, isla markaan aanay lahayn duqsi ama cayayaan kale.

(3) Wasaaraddu, ka dib marka ay la tashato wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee qaabbilsan warshadaha, dhulka, caafimaadka iyo maamulka dawladaha hoose, waa inay ka soo saartaa shuruuc ay u hogaansamaan noocyada kala duwan ee warshaduhu .

(4) Goleyaasha degmooyinku, marka laga hadlayo Deegaanada degmooyinka iyo tuulooyinka , waa inay jaan-gooyaan :

b) Hababka ugu macquulsan ee qashinka adkaha ah looga ururin karo goobaha ay ka dhasheen, waxa ayna keligood ama iyaga oo kaashanaya shirkad ganacsi oo gaar loo leeyahay , u hawl-galayaan in dib loo soo cesho(qaan-dhabo) kharashkii lagu baxshay fogeynta qashinka adkaha ah; iyo

t) Qalab ku habboon iyo habab loo marayo marka la fogeynayo qashinka adkaha ah;

j) Khidmadda lagu qaadayo qashinka adkaha ah.

## Qodobka 43-aad
## Goobaha lagu kala Wareejiyo Qashinka

(1) Goleyaasha Deegaanku waxa ay cayimmi karaan goobo gaar ah oo lagu qubo qashinka adkaha ah ee magaalooyinka, ama degmooyinka, ama Deegaannada kale ee uu ka dhasho qashin adke ah oo fara badan.

(2) Ka hor inta golaha Deegaanku cayimin goob lagu kala wareejiyo qashinka, waxa uu:-

b) Daraasad ka sameynayaa saameynta bulsho, caafimaad iyo Deegaan ee ka dhalan kara.

t) hubinayaa in baaxadda goobtu tahay mid ku filan (waasac ah), isla markaana ka fog tahay meelaha dadku deggan yahay (residential area);

j) hubinayaa in qashinka adkaha ah si joogto ah loo qaado, si uusan u fara badan;

x) Hubinayaa in goobta xayndaab lagu wareejiyo, si aysan isaga geli Karin xayawaanka iyo dadka aan amarka u haysan.

**Qodobka 44-aad**
**Fogeynta kama Danbaysta ah ee Qashinka Adkaha ah**

i. Goleyaasha degmooyinka, marka ay xulanayaan goobaha iyo qaababka ugu habboon ee qashinka adkaha ah looga fogeyn karo dhulka ay ka shaqeeyaan, waxa ay tix-gelin siinayaan arrimaha soo socda:-

b) xaaladaha cimilada;
t) awoodda dhaqaale;
j) danaha bulshada;
x) faa'idooyinka Deegaan, sixo iyo bulsho; iyo
kh) In la ballaarin karo baaxadda goobta.

**Qodobka 45-aad**
**Xakamayta Qashinka Goobaha Dadku isugu Yimaado**

(1) Qof walba oo meherad ku haysta fagaare dadku isugu yimaado, waa in uu sameeyo goob gaar ah oo dadku qashinka ku rido, si goobtu qashin uga bad-baaddo.

(2) Haddii qashin ka soo guuro ama ka soo yaaco guri/dhisme ay dad deggan yihiin oo u soo gudbo fagaare ay dadku isugu yimaadaan, Kormeeraha Deegaanku waxa uu ka dalbayaa cidda deggan guriga/dhismaha in ay sida ugu wanaagsan arrintaa wax uga qabtaan.

(3) Haddii ay muuqato in qashin aad u fara badan uu ka imanayo guri/dhisme, Kormeeraha Deegaanku waxa uu ka dalbayaa cidda deggan guriga/dhismaha in ay goobta agteeda ka sameyso ama ka dhisto meel lagu ururiyo qashinka, si fagaaraha dadku isugu imanayo looga dhowro qashinkaas.

(4) Haddii cidda deggan guriga/dhismaha ay diiddo oo wakhti go'aan ugu hoggaansami weydo amarka uu siiyey Kormeeraha Deegaanka sida ku xusan faqradaha (2) iyo (3), sarkaalku waxa uu qaadi karaa wixii tallaabooyin macquul ah ee xal noqon kara, waxa uuna kharashka ku baxay ka qaadayaa cidda deggan guriga/dhismaha.

(5) Cid walba oo qodobkan ay khuseyso waxa laga doonayaa in ay gurto qashinka ku ururay goobta loogu talo-galay ee uu asagu mas'uulka ka yahay, si joogto ah oo habboon.

**Qodobka 46-aad**
**Fogeynta Qashinka ee Dadka Deggan Deegaannada Gaarka Loo Leeyahay**

Kormeeraha Deegaanku waxa uu ogeysiin qoraal ah siin karaa cid walba oo deggan Deegaan gaar loo leeyahay (private land), isaga oo amar ku siinaya in ay-

b) ka ururiyaan, ama ka qaadaan dhulka qashinka.
t) ka nadiifiyaan qashinka, ama
j) daboolaan ama qariyaan qashinka si aan loo arag, waxayna ku fulin sida ku qeexan ogeysiinta, muddo cayiman.

**Qodobka 47-aad**
**Ciqaabaha Denbiyada la xiriira Cutubka 1aad**

(1) Qof kasta oo cududaar sharci ah oo maangal ah aan haysan, diida ama ka baaqsada in uu u hoggaansamo axkaamta ku xusan qaybtaan 1aad waxa uu mutaysanayaa ciqaan xabsi ah oo u dhexeeya hal sanno ilaa saddex sanno iyo ganaax lacageed oo u dhexeeya laba milyan ilaa toban iyo Shan milyan Sh.So.

(2) Ciqaabta ku qeexan faqradda (2) waxa dheeraad ku ah iyada oo qofka dembiilaha ahi ay maxkamaddu ku xukumi karto-

b) in uu bixiyo kharashka ay dawladdu wax uga qabaneyso khasaaraha ama waxyeellada ka dhalatay wasakhda uu daadshay; iyo

t) in uu mag-dhow siiyo cid kasta oo waxyeello ka soo gaartay, taas oo noqon karta dayactir, hagaajin, ama mag-dhow le'eg hadba inta maxkamaddu go'aamiso.

**Cutubka 2aad**

**Qashinka Dareeraha ah**

**Qodobka 48-aad**
**Goobta Lagu Qubayo Qashinka Dareeraha Ah**

(1) **Goleyaasha degmooyinka waxa ay bixin karaan a**mar iyo tilmaan ku saabsan sida loola tacaalayo, loona fogeynayo qashinka dareeraha ah ee ka soo baxa goobaha kala duwan ee degmada.

(2) Iyada oo aan la jebineyn faqrada (1), Wasaaraddu waxa ay soo saari kartaa tilmaameyaal gaar ah oo goleyaasha Deegaanku raacaan marka ay ka shaqaynayaan fogeynta qashinka dareeraha ah guud ahaan ama noocyo gaar ah oo ka mid ah qashinkaas.

**Qodobka 49-aad**
**Raridda iyo Asturidda Qashinka Dareeraha ah**

Goleyaasha degmadu waxa ay tilmaameyaal iyo shuruudo ka soo saari karaan habka loo qaadayo wasakhda bullaacadaha iyo gufurka haamaha sunta (sludge from septic tanks) iyada oo la adeegsanayo gaadiid gaar ah oo loogu talo-galay.

**Qodobka 50-aad**
**La-Tacaalidda Wasakhda Dareeraha ah**

(1) Maamulka degmadu waa in ay xaqiijiyaan in wasakhda bullaacadaha si habboon loo sifeeyo ama loo daweeyo, ka hor inta aan dibedda lagu qubin, si aysan u faafin cudurro ama khal-khal iyo xaaluf ugu keenin Deegaanka.

(2) Haddii markaas maamulka degmadu aanu awoodin daawaynta ama sifaynta wasakhda bullaacadaha ee ku xusan faqradda (1) waa in ay xaqiijiyaan habab kale oo ku habboon kuwaas oo meel ku habboon u astaynaya qubista qashinka bullaacadaha.

**Qodobka 51-aad**
**Fogaynta Wasakhda Dareeraha ah**

(1) Goleyaasha degmooyinku waa in ay asteeyaan goobo gaar ah oo loo asteeyay ku daadinta waskhada dareeraha ah sida godadka qashinka lagu qubo, qalab ama tasiilaad dib u daaweeya qashinkaas ama goobo bullaacad ahaan u qaada.

(2) Goleyaasha Deegaanku waa inay hubiyaan, haddii ay jiraan goobo gaar ah oo loogu talo-galay in lagu qubo wasakhda dareeraha ah, in dhamaan wasakhda dareeraha ah ee ka soo baxday warshadaha, ganacsiga iyo kuwa kale ee ka soo baxa degmada, in lagu qubo godadka loogu talo-galay oo keliya.

(3) Wasaaraddu waa in ay soo saarto nidaam tilmaamaya habka ugu wanaagsan ee loola tacaali karo wasakhda dareeraha halista ah, iyo tan aan halista ahayn, ee ka dhalata warshadaha.

**Qodobka 52-aad**
**Xakameynta iyo La-Socoshada Bullaacadaha**

Kadib marka la dhiso, isla markaana uu hawl-galo hab-dhiska bullaacadaha magaalooyinka, Wasaaradda oo kaashanaya goleyaasha Deegaanka, waa in ay gacan ka gaysataa qaadidda tallaabooyin joogto ah oo lagu hubinayo in wasakhda bullaacaduhu sii deynayaan ay waafaqsan tahay heerka ay jaangoysay Wasaaraddu.

**Qodobka 53-aad**
**Maareynta Biyaha Daadka**

(1) Gole kasta waa in uu degmada uu ka shaqeeyo ka hirgaliyaa moosas(kanaalo) dhulka looga qallajiyo daadadka roobka.

(2) Biyo-mareenka waa in gacanta lagu hayaa, loona dayactiraaa danta loo dhisay.

(3) Wasaaraddu waxa ay soo saari kartaa shuruuc ku saabsan:-

b) in kanaalada ama moosaska loo dhiso qaab daa-deg ah si ayan biyuhu u fariisan;

t) In kanaalada iyo moosaska dabool leeyihiin, isla markaana leeyihiin baro dhisan oo laga nadiifin karo haddii uu xirmo ama ay wax ku cufaysmaan.

**Qodobka 54-aad**
**Ciqaabaha Denbiyada la xiriira Cutubka 2aad**

1. Qof kasta oo cududaar sharci ah oo maangal ah aan haysan, diida ama ka baaqsada in uu u hoggaansamo axkaamta ku xusan cutubka 2aad waxa uu mutaysanayaa ciqaab xabsi ah oo u dhexeeya hal sanno ilaa saddex sanno iyo ganaax lacageed oo u dhexeeya laba milyan ilaa toban iyo Shan milyan Sh.So.
2. Ciqaabta ku qeexan faqradda (1) waxa dheeraad ku ah iyada oo qofka dembiilaha ahi ay maxkamaddu ku xukumi karto-

b) in uu bixiyo kharashka ay dawladdu wax uga qabaneyso khasaaraha ama waxyeellada ka dhalatay wasakhda uu daadshay; iyo
t) in uu mag-dhow siiyo cid kasta oo waxyeello ka soo gaartay, taas oo noqon karta dayactir, hagaajin, ama mag-dhow le'eg hadba inta maxkamaddu go'aamiso.

**Cutubka 3aad**
**Wasakhda hooraha ah ama hawada raacda (gaseous waste)**

**Qodobka 55-aad**
**Maareynta Wasakhda hooraha ah ee ka soo baxda Guryaha**

(1) Goleyaasha degmadu waxa ay hubinayaan guryaha la deggan yahay-

b) in ay leeyihiin bed ku filan oo leh meel hawadu ka baxdo (ventilation); iyo
t) In ay leeyihiin qaab qaacu (smoke) uga baxo kushiinka ama jikada, isla markaana bed gudaha ah oo ku filan.

**Qodobka 56-aad**
**Xakameynta Qashinka hooraha ah ee Warshadaha**

(1) Iyaga oo tix-gelinaya jihada dabeysha iyo talo-bixinta ka timid Daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka, Goleyaasha degmooyinku waxa ay hubinayaan neefaha ka dhasha warshadaha in laga fogeeyo meelaha ay dadku deggan yihiin.
(2) Gole deegaanwalba waxa uu soo saarayaa shuruuc, hab-raac iyo ciqaab ku saabsan:
b) in si joogto ah loo hubiyo in qalabka ama makiinadaha (machinery) si wanaagsan u shaqeynayaan, isla markaana aysan soo deyn hoore sun ah; iyo
t) In astaamaha shooladda (iskaamiitada) uu qaacu ka baxo lagu xiro warshadaha aaladaha maamula neefaha ama yareeya.

## Qodobka 57-aad
## Neefaha iyo wasakhda ka Dhalata Gaadiidka

(1) Wasaaraddu, iyada oo la tashanaysa Wasaaradda Caafimaadka, waa in ay soo saartaa xeerar gaar u qeexeysa heerka ama caddadka la oggol yahay ee neefta Kaarboon mono Ogsaydh (carbon monoxide), haydarokaarboonnada (hydrocarbons), iyo neefaha kale ee sunta ah, degmada gudaheeda.

(2) Haddii ay jiraan shuruudo heer Federaal ah, goleyaasha degmadu waxa ay dhaqan-gelinayaan shuruudahaas heerka qaran ah ee ku saabsan neefaha hawada lagu sii daayo.

## Qodobka 58-aad
## Ciqaabaha Denbiyada la xiriira Cutubka 3aad

(1) Qof kasta oo cududaar sharci ah oo maangal ah aan haysan, diida ama ka baaqsada in uu u hoggaansamo axkaamta ku xusan cutubkaan 3aad waxa uu mutaysanayaa ciqaab xabsi ah oo u dhexeeya hal sanno ilaa saddex sanno iyo ganaax lacageed oo u dhexeeya Shan milyan ilaa labaatan iyo Shan milyan Sh.So.

(2) Ciqaabta ku qeexan faqrada (1) waxa dheeraad ku ah iyada oo qofka dembiilaha ahi ay maxkamaddu ku xukumi karto-

1. in uu bixiyo kharashka ay dawladdu wax uga qabaneyso khasaaraha ama waxyeellada ka dhalatay wasakhda uu daadshay; iyo
2. In uu mag-dhow siiyo cid kasta oo waxyeello ka soo gaartay, taas oo noqon karta dayactir, hagaajin, ama mag-dhow le'eg hadba inta maxkamaddu go'aamiso.

# Cutubka 4aad
# Wasakhaha Halista ah

## Qodobka 59-aad
## Masuuliyadda Goleyaasha Degmooyinka kaga aadan Wasakhda Halista ah

(1) Golayaasha degmooyinku waa inay hubiyaan in Deegaanka ay ka shaqeeyaan ay leeyihiin -

(a) Hal-beegyo loo dejiyey in lagu cabiro maareynta wasakhda halista ah iyo in lagu dhaqmo wakhti walba;

(b) Meel neefta ama qaaca ka baxo oo ay leeyihiin dhismayaasha ay ka dhalato wasakhda halista , isla markaana la xaqiijiyo in la raaco hal-beegyada loo dejiyay;

(c) wasakhda dareeraha ah in si habboon loola tacaalo, ama lagu sameeyo isbeddel (laga dilo jeermisga) sida waafaqsan shuruudaha ka hor inta aan la qubin; iyo

(d) Wasakhda dareeraha halista ah in loola tacaalo sida waafaqsan shuruudaha Deegaanka wershadda ama goobta ka hor inta aan la qubin ama lagu shubin godadka ay dawladda hoose u qorsheysay ama meelaha bannaanka ah.

## Qodobka 63-aad

## Awoodaha Guud ee Goleyaasha Degmooyinku Ku Yareyn Karaan Qashinka

(1) Iyada oo aan laga hor-imaaneyn awoodaha golaha Deegaanka sharcigu u siiyey dhanka maareynta qashinka, gole deegaankasta waxa uu yeelan doonaa awood uu kaga hor-tago, ama hoos ugu dhigo wasakhda adkaha, dareeraha, neefta ama sunta halista ah.

Si loo maareeyo wasakhda, Wasaaraddu waxa ay kula talin kartaa Wasiirka qaabbilsan dawladaha hoose in uu qof u magacaabo awoodaha golaha Deegaanka ee kari waayey in ay gutaan xilkooda, ama awoodohooda marka laga hadlayo arrimaha ku xusan qodobkaan.

## Qodobka 64-aad

## Mamnuucista Wasakheynta Biyaha Badda

(1) Waxaa reeban in gaadiidka baddu si sharci darro ah ugu safraan (shiraacdaan) biyaha Puntland ama u hoggaansami waayaan shuruucda iyo xeerarka caalamiga ah ee saldhigga u ah in gaadiidku Safar geli karo.

(2) Lama Oggola in saxiimad, markab, maraakiibta gujiska ah, diyaarad ama aalad kale oo ah gaadiidka lagu qaado saliidda ama gaaska ay wasakh ku daadiyaan xadka biyaha Puntland, bedka qalfoofka ay ku fadhido qa (dhulka hoostiisa) ama aagga dhaqaalaha u gaarka ah (EEZ), arrintaas oo noqoneysa fal-dembiyeed. Haddii ay sii socoto arrintan, maalin walba oo cusub waxa loo xisaabinayaa in ay tahay fal-dembiyeed gaar ah.

(3) Lama Oggola in Deegaanka badda iyo xeebta laga wasakheeyo dhanka berriga; sida kheyraadka dhulka, afka togagga (Togaggu dhulka halka ay badda kaga darsamaan), wasakhda ka dhalata cisbitaallada, ama tan ka dhalata warshadaha, dhismaha iyo haraadi kasta oo sun ah.

## Qodobka 65-aad

## Mamnuucista Sunta ama Qashinka Badda lagu Aaso

(1) Wasaaraddu, iyada oo la kaashanaysa hay'adaha ay khusayso, waa in ay dejisaa shuruuc lagaga hortagayo dikhawga badda uga yimaada sunta ama qashinka lagu aaso.

(2) Dhammaan shirkadaha dalka laga leeyahay ama kuwa caalamiga ah ee haysta ruqsad ay ku sameeyaan hawlo macdan ama shidaal qodid ama sahmin ama hawlo looga faa'iidaysanayo khayraadka badda waa in ay u hoggaansamaan shuruudaha ka degsan ilaalinta Deegaanka badda.

(2) Shuruudaha iyo tilmaameyaasha uu dejiyo golaha Deegaanka ee ku saabsan Xeerkan, waa in ay waafaqsan yihiin shuruudaha ku qeexan Xeerkan.

## Qodobka 60-aad
## Daraasadda Sahminta Saameynta Wasakhda Halista ku ah Deegaanka

(1) Sida ku xusan faqrada (2), wasakhda halista ah waxa loo gurayaa hab waafaqsan ilaalinta suuban ee Deegaanka.

(2) Si haddaba loo xaqiijiyo ilaalinta suuban ee Deegaanka, waa in la sameeyaa Daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka, ka hor inta aan wasakhda halista ah lagu daadin carrada, dhulka, hawada ama biyaha.

## Qodobka 61-aad
## Fogaynta kama damaysta ah ee Wasakhda Halista Ah

(1) Wasaaraddu, iyada oo la tashanaysa Wasaaradda Caafimaadka iyo maamulada degmooyinka, waa inay xaqiijisaa in qashinka ka dhasha daryeelka caafimaadka la kala saaro, laguna kala guro haamo leh calaamado kala duwan, laguna qaado gaadiid loo asteeyay.

(2) Wasaaraddu, iyada oo la kaashanaysa Wasaaradda Caafimaadka, waa in ay tilmaan ka bixisaa qaabka ugu habboon ee loo qubi karo noocyada kala duwan ee qashinka ka dhasha daryeelka caafimaadka.

(3) Qodobkaan ka hadlaya "qashinka ka dhasha daryeelka caafimaadka" waxa ku jira, balse aan ku koobneyn, qashinka wata cudurrada, walxaha mudaca ah, kiimiko, sun-hiddeed, qashinka walxaha shucaaca bixiya, xinjir dhiig iyo dawo.

## Qodobka 62-aad
## Fogaynta Noocyada Kale ee Wasakhda

(1) Wasaaraddu, iyada oo la kaashanaysa wasaaradaha iyo hay'daha kale ee ay khuseyso, waxa ay soo saaraysaa hababka ugu muhiimsan ee loo qaadi karo:
(a) wasakhda ka dhalata xoolaha lagu qalo kawaanka;
(b) dawada xoolaha;
(c) wasakhda ka dhalata qodaalka beeraha;
(d) wasakhda kiimikada beeraha;
(e) wasakhda kiimikada; iyo
(f) Wixii kale ee ay Wasaaraddu u aragto in ay yihiin wasakh.

## Qodobka 66-aad
## Mamnuucista Qubista Walxaha Halista ah, sida kiimikada iyo walxaha kale

(1) Qofna kuma shubi karo ilaha biyaha ama Deegaanka intiisa kale walxo halis ah, kiimiko, saliid, ama isku-jir ka kooban saliid laga reebo sida waafaqsan xeerarka iyo tilmaamaha uu qeexayo Xeerkan ama sharci kale oo qoran.

(2) Qofkii ilaha biyaha ama Deegaanka intiisa kale ku shuba walxo halis ah, kiimiko, saliid ama isku-jir ka kooban saliid, waxa uu galay fal-dembiyeed.

(3) Waa mas'uuliyad saaran urur ama shakhsi walba oo soo saara, rara, ka-ganacsada, isticmaala, keydiya ama quba kiimiko, saliid, maaddo sun ah, ama walxaha qarxa, in ay u hoggaansamaan xeerarka ay Wasaaraddu u dejisay bad-baadada aadanaha iyo nafleyda kale, isla markaana laga feejignaado waxyaabaha sababi kara xaalufka Deegaanka.

(4) Si loo nidaamiyo soo saarista , kaydinta ama raridda walxaha halista ah, walxaha guban kara (inflammable) ama walxaha qarxa (explosives) waxa ay ku amri kartaa milkiilayaasha walxahaas in ay yareeyaan saamaynta xun ee hawlahooda ku reebi karaan Deegaanka, iyada oo -

b) Wasaaradda iyo hay'adaha kale ee ay khuseyso dhakhso ula socodsiiyaan marka ay qashin ama haraa daadinayaan.

t) inay si deg-deg ah u nadiifiyaan goobaha saamaynta kasoo gaartay, iyaga oo adeegsanaya qaababka ugu wanaagsan ee wax loo nadiifin karo;

J) In ay u hoggaansamaan amaawiirta/tilmaamaha ay bixiso Wasaaraddu.

(5) Wasaaraddu waxa ay joojin kartaa soo-saarista, keydinta, goobta raridda iyo gaadiidka ama maraakiibta ilaa milkiilaha ama cidda ka shaqeysa ay u hoggaansanto axkaamta ku xusan faqrada (4).

(6) Wasaaraddu waxa ay maxkamadda ka dalban kartaa amar lagu joojinayo wax-soo-saarista, keydinta, gudbinta, gaadiidka ama maraakiibta haddii milkiiluhu diido, in uu u hogaansamo axkaamta ku xusan faqradda (4)

(7) Iyada oo aan lagu xad-gudbeyn shuruucda kale ee jirta, Wasaaraddu waxa ay hubineysaa in dhamaan warshadaha soo saara ama dhaliya haraaga suntan ah ee halista ah ay waafaqaan shuruucda loo dejiyey ilaalinta Deegaanka, isla markaana sameeyaan hubin joogto ah iyo qiimeyn lagu eegayo saameynta ay ku leedahay Deegaanka.

## Qodobka 67-aad
## Ciqaabaha Denbiyada la xiriira Cutubka 4aad

(1) Qof kasta oo cududaar sharci la'aan, diida ama ka baaqsada in uu u hoggaansamo axkaamta ku xusan cutubka 4aad waxa uu mutaysanayaa ciqaab xabsi ah oo u dhexeeya saddex sanno ilaa Shan sanno iyo ganaax lacageed oo u dhexeeya toban milyan ilaa boqol milyan Sh.So.

(2) Ciqaabta ku qeexan faqradda (2) waxa dheeraad ku ah iyada oo qofka dembiilaha ahi ay maxkamaddu ku xukumi karto-

(a) in uu bixiyo kharashka ay dawladdu wax uga qabaneyso khasaaraha ama waxyeellada ka dhalatay wasakhda uu daadshay; iyo

(b) In uu mag-dhow siiyo cid kasta oo waxyeello ka soo gaartay wasakhda uu daadshay, taas oo noqon karta dayactir, hagaajin, ama mag-dhow le'eg hadba inta maxkamaddu go'aamiso.

(3) Isla ciqaabta ku xusan faqradda (1) waxaa wehelin karta la wareegista gaadiidka ama aaladaha kale oo loo adeegsaday sun ku xabaalidda xad badeedka Puntland.

## QAYBTA 7aad

## AWAAMIIRTA DIB-U- HAGAAJINTA DEEGAANKA

### Qodobka 68-aad
### Amarka Dib-u-Soo Noolaynta Deegaanka

(1) Wasaaraddu waxa ay amar dib-u-soo nooleyn Deegaanka ah siin kartaa cid walba oo ku hawlan maareynta Deegaanka iyo kheyraadka debiiciga ah.

(2) Amarka dib-u-soo nooleynta Deegaanka ee ku xusan faqradda (1) waxaa loo adeegsan karaa si:

b) qofku Deegaanka dib ugu soo cesho xaaladdii uu ku sugnaa ka hor intii aanay iman xaaladda sababtay in amarka la bixiyo.

t) looga hor-tago in qofku sameeyo ficil waxyeello ku keeni kara Deegaanka;

j) qofka loogu xukumo in uu mag-dhow siiyo cid kasta ay dhibaato naf iyo maal kasoo gaartay.

x) Lacag ama kharash loo saaro qofka dhibta gaystay, taas oo ah qiimo macquul ah oo u dhigma kharashka maamulka ama ururrada ka bixi lahaa haddii dib loogu soo cesho Deegaanka sidii uu ahaa ka hor inta aysan iman xaaladda sababtay in amarka la soo saaro.

(3) Amarka dib loogu soo nooleynayo Deegaanka waxa ku jiri kara shuruudaha, kuwaas oo waajibaad saaraya dadka loo adeegayo, si amarka si sahlan loofuliyo.

(4) iyada oo aan la jebineyn raadka sharciyeed ee ka dhalanaya faqradda (2) ama awoodaha Wasaaraddu ay wax uga qaban karto dib u soo nooleynta Deegaanka, amarka dib loogu soo nooleynayo Deegaanka waxa uu waajib uga dhigayaa qofka amarka la siiyey:-

b) in uu qaado tallaabo looga hor-tagayo bilaabista ama sii socoshada dikhowga (wasakheynta);

t) in uu dib u soo nooleeyo dhulka, iyada oo ay ku jirto beddelaadda carrada, beerista dhirta, iyo tarminta ugaarta, dayactirka goobaha taariikhiga ah ama bedka dhulka ku qeexan amarka;

j) in uu qaado tallaabo looga hor-tagayo bilaabista , ama joojinta waxyaabaha halista ku ah Deegaanka;

x) In uu joojiyo tallaabo kasta oo waskah sun ah oo keeni karta dikhaw Deegaanama khatar Deegaan.

Kh) in uu saaro ama yareeyo dhaawac kasta oo dhulka ama Deegaanka gaaraya;

d) in uu ka hor-tago dhaawaca gaaraya dhulka, Deegaanka, keydka biyaha ku jira dhulka hoostiisa, dhirta iyo xayawaanka ku nool dusha iyo hoosta dhulka ama Deegaanka ku hareersan dhulka ku xusan amarka;

r) in uu qashinka ku shubo meelaha loogu talo-galay;

s) In uu bixiyo wixii mag-dhow ah ee ku qoran amarka.

(5) Marka ay gudanayso xilka ku qeexan faqraddan,Wasaaraddu waxa ay tix-gelin siineysaa—

b) mabda'a joogteynta isticmaalka kheyraadka, mabda'a feejignaanta, mabda'a ah in qof walba oo deeganka waseekhaya uu bixiyo kharash lagu hagaajiyo , mabda'a sinnaanta iyo wasakhda oo si wanaagsan loo maareeyo, iyo mabaa'dii-da kale ee la xiriira Deegaanka; iyo

t) Xuquuqda dastuuriga iyo kuwa sharci ee qofka amarku ku socdo la siiyay.

## Qodobka 69-aad
## Bixinta amarka dib u soo Noolaynta Deegaanka

(1) Haddii Wasaaradda u muuqato in qof uu waxyeellaynayo ama ay suurtagal tahay in uu waxyeello u gaysto Deegaanka, waxa ay qofkaas siineysaa amar dib loogu soo celinayo Deegaanka, iyada oo amar ku siineysa qofka in uu wax kaga qabto waxyeeladamuddo aan ka yareyn soddon casho gudaheed oo ka bilaabaneysa wakhtiga amarka la baxshay iyo in uu mag-dhaw ka baxsho waxyeelada uu gaystay sida ku xusan hadba amarka.

(2) Amarka ah in dib loo soo cesho Deegaanka waa in uu si cad oo la fahmi karo u qeexayaa in:-

b) Hawsha ay khuseyso;

t) Qofka ama cidda ay ku socoto;

j) wakhtiga ay dhaqan-galeyso;

x) Hawsha ay tahay in la qabto si loo soo cesho Deegaanka iyo muddada la doonayo in hawsha lagu dhameeyo, taas oo aan ka yareyn soddon casho ama inta muddo ah ee ku qoran amarka;

kh) Awoodaha ay Wasaaraddu ku geli karto dhul, kuna fulin karto tallaabooyinka ku xusan faqradda (d);

d) Ciqaabta la marinayo haddii la waafaqi waayo faqradda (d);

r) Xuquuqda uu u leeyahay qofka la siiyey amarka dib u soo celinta Deegaanka in uu amarkaas maxkamad u gudbiyo ama kaga dacwoodo.

(3) Waaxdu waxa ay kormeer ku sameyneysaa, ama cid kale u direysaa in ay kormeerto, hawl walba si ay u go'aamiso in hawshaasi waxyeello ku tahay Deegaanka, waxa ayna tix-gelin siineysaa natiijada ka soo baxda kormeerka in ay hawshaas u goyso amarka dib u soo celinta Deegaanka iyo in kale.

(4) Waaxdu waxa ay dalbi kartaa, ama tix-gelin siineysaa talooyinka cilmiga ah, kuwa xirfadeed iyo kuwa farsamo ee ay u aragto in ay wax ka tarayaan go'aan ka gaarista bixinta amarka dib u soo celinta Deegaanka.

(5) Amarka dib u soo celinta Deegaanku kama harayo in uu daba-galo hawsha loo bixiyey amarka (waa uu jirayaa ama soconayaa), illaa sidii la rabay loo fuliyo.

(6) Qofka la siiyey amarka dib-u-soo celinta Deegaanka, asaga oo raacaya Xeerkan, waxa uu u hoggaansamayaa dhamaan qodobbada iyo shuruudaha amarka la siiyey.

## Qodobka 70-aad
## Dib uga Fiirsashada Amarka Dib u hagaajinta Deegaanka

(1) Muddo kow iyo labaatan casho ah gudaheed ka dib marka la siiyey amarka dib u soo celinta Deegaanka, qofka la siiyey amarka waxa uu qoraal ka fiirsasho amarka ah u soo gudbin karaa Wasaaradda, isaga oo sharraxaya sababaha.

(2) Haddii qofku soo gudbiyo codsi qoraal ah sida ku cad faqrada (1), amarku waa jirayaa illaa wax laga beddelayo, la hakinayo ama gebi ahaan la tir-tiro amarka sida ku xusan faqradda (3) , haddiise wax laga beddelo oo keliya, amarku waxa uu ku sii soconayaa sidii wax looga beddelay.

(3) Haddii codsi la soo gudbiyo sida ku qoran faqradda (1), Wasaaraddu waxa ay muddo soddon casho ah gudaheed oo ka billaabaneysa maalinta codsiga la soo gudbiyey, dib uga fiirsaneysaa amarka dib u soo celinta Deegaanka, isla markaana cidda soo gudbisay codsiga waxa ay qoraal ugu gudbineysaa go'aanka ay ka gaartay codsiga.

(4) Wasaaraddu, ka dib marka ay ka fiirsato kiiska, waxa ay xaqiijin kartaa, wax ka beddeli kartaa, hakin kartaa, ama dib ula laaban kartaa amarka dib u soo celinta Deegaanka.

(5) Waaxdu waxa ay siineysaa cidda soo gudbisay codsiga ka-fiirsashada amarka dib u soo celinta Deegaanka, fursad ay ku hadasho Af-ahaan, ka hor inta aan la gaarin go'aanka.

## Qodobka 71-aad
## Fulinta Amarka Dib u hagaajinta Deegaanka

(1) Haddii qofka la siiyey amarka dib u soo celinta Deegaanku kari waayo, dayaco, ama diido in uu u hoggaansamo amarka la siiyey, Wasaaraddu, iyada oo wadata hawl-wadeennada iyo saraakiisha u shaqeeya, waxa ay geli kartaa ama fari kartaa cid kale

in ay gasho dhulka uu maamulo qofka amarka la siiyey, si ay u fuliyaan dhamaan axkaamta ku qoran amarka.

(2) Wasaaraddu marka ay gudaneyso xilkeeda sida ku xusan faqradda (1), waxa ay sharci ahaan xaq u yeelaneysaa in dib loogu soo cesho kharashka ka galay fulinta hawsha ku xusan faqradda (1).

## Qodobka 72-aad
## Amarka Maxkamadeed ee Dib u Soo Celinta Deegaanka

(1) iyada oo aan laga hor-imaaneyn awoodaha Wasaaraddu ku bixin karto amar ku saabsan Deegaanka, maxkamaddu, haddii la hor keeno dacwad, waxa ay amar dib u soo celin Deegaansiin kartaa cidda waxyeellada gaarsiiyey, gaarsiinaysa ama damacsan in ay gaarsiiso Deegaanka.

(2) Si looga fogaado tuhun, loogama baahna cidda dacwadda oogeysa in ay keento caddeyn ay ku muujineyso in ay dano gaar ah ka leedahay hantida ama Deegaanka dhibku gaaray.

## Qodobka 73-aad
## Ciqaabaha Denbiyada la xiriira awaamiirta dib usoo celinta Deegaanka

Qofkasta oo ku fashilma ama diida in uu u hoggaansamo awaamiirta dib u soo noolaynta Deegaanka ee ku xusan qodobada 75 – 78 waxa uu galayaa denbi ciqaabtiisu tahay xabsi aan ka badnayn 12 bilood ama ganaax aan ka badnayn toban milyan sh.So.

# QAYBTA 8-AAD
# QIIMEYNTA SAHMINTA SAAMEYNTA DEEGAANKA IYO DABAGALKA KORMEERKA IYO DIIWAANGELINTA

## Cutubka 1-aad
## Daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaankaiyo Dabagalka

## Qodobka 74-aad
## Fulinta Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Xisaabinta

(1) Qofna ma fulin karo hawl, qorshe ama mashruuc kaas oo ay suurtagal tahay in uu saamayn ku yeesho Deegaanka ilaa lagu sameeyo daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka.

(2) Wasaarad ama wakaaladi waa in aanay ruqsad ama ogolaansho siin hawl ama mashruuc saamayn xun ku yeelan kara Deegaanka ilaa lagu sameeyo daraasadda ku xusan faqradda (1).

(3) Daraasadda Sahminta Saameynta Deegaanka iyo la-socoshada iyo dabagalka Deegaanka waxa lagu fulinayaa si waafaqsan axkaamta Xeerka Sahminta Saamaynta Deegaanka, isla

markaana arrimaha la xiriira qiimeynta Deegaanka iyo dabagalka waa in ay noqdaan kuwa waafaqsan axkaamta xeerkaas .

(4) Haddii arrin ku saabsan Samaynta daraasadda Sahminta Deegaanka, dabagalka iyo kormeerka lagu sameeyay hab waafaqsan axkaamta xeerka Sahminta Saamaynta Deegaanka, asay ka hor imaanayaan axkaamta Xeerakan , waxaa la qaadanayaa oo mudnaanta la siinayaa xeerka Sahminta Saamayaynta Deegaanka.

## Qodobka 75-aad
## Qiimeynta Saameynta Deegaanka, dabagalka iyo Warbixinnada kormeerka

(1) Qiimeynta saameynta Deegaanka, dabagalka iyo warbixinnada waa in ay fuliyaan khubarro ama shirkado aqoon u leh, oo ay wakiilatay Wasaaraddu, sida ku xusan xeerka Sahminta Saamaynta Deegaanka.

(2) Wasaaraddu waxa ay diiwaan- gelinaysaa dhamaan khuburrada ama shirkadaha loo idmaday in ay sameeyaan ama diyaariyaan daraasado ku saabsan qiimeynta saameynta Deegaanka iyo warbixinnada la xiriira.

(3) Diiwaanka lagu keydiyo xogaha iyo warbixandu waa in ay noqdaan mid dadku wada arki karo wakhti walba oo loo baahdo iyo cid walba oo u baahata.

## Cutubka 2aad
## Diiwaangelinta iyo Kormeerka

## Qodobka 76-aad
## Diiwaanka Dokumeentiyada (Records)

(1) Cid walba oo fulineysa hawl saameyn weyn ku leh, ama ku yeelan karta, Deegaankaama hawl kale oo kasta oo ay fasaxday ama la socoto Wasaaraddu, waa in ay haysaa diiwaanka dokumeentiyada la xiriira —

b) caddadka wasakhda ah ama waxyaabaha ka dhasha hawsha;
t) heerka ay gaarsiisan tahay hawsha uu hayo, taas oo tilmaan ka bixineysa qiimaha dhaqaale ee hawsha, laguna cabbirayo qiime lacageed-ka badeecada sannadkiiba;
j) saameynta muuqata ee hawshu ku leedahay Deegaanka;
x) ilaa iyo heerka loo hogaansamay shuruudaha ku xusan Xeerka.

(2) Diiwaanka ku xusan faqradda (1) waxa hubinaya sarkaal ay Wasaaraddu u xilsaartay qabashada hawsha kormeerka iyo kormeere oo Deegaanno heer degomo iyo sarkaal kasta oo kale oo dawladeed haddii loo baahdo.

## Qodobka 77-aad
## U-Gudbinta Diiwaanka Wasaaradda

(1) Diiwaanka ku xusan qodobka 82 waxa sannad walba loo gudbinayaa Wasaaradda ama waaxda qaabilsan ee isla wasaaradda ama cidda wakiilka u ah, gudbintaas oo aan ka dib dhici Karin hal bil ka dib marka sanadku dhamaado.
(2) Diiwaanka loo gudbinayo maamulka waxa loo isticmaalayaa diyaarinta warbixinta ku saabsan xaaladda Deegaanku ku sugan yahay ee xeerakani amrayo.

## Qodobka 78-aad
## Magcaabista Kormeerayaal Deegaan

Wasaaraddu, iyada oo ku salaynaysa baahiyaha jira, kuna soo saaraysa faafinta rasmiga ah ee dawladda, waxa ay magacaabi kartaa koremeereyaal Deegaan hadba tirada loo baahdo, oo ah saraakiil dawladeed oo aqoonta hawsha leh, kana hawlgala hadba Deegaanka loo magacaabo sida ku xusan ogaysiinta faafinta rasmiga ah.

## Qodobka 79-aad
## Awoodaha iyo Xilalka Kormeereyaasha Deegaanka

(1) Kormeeraha Deegaanku, inta uu gudanayo xilalkiisa ku qeexan Xeerka ama shuruudaha hoos yimaada, goor walba asaga oo aan oggolaansho dalban—
b) waxa uu geli karaa dhul, dhisme ama gaadiid si uu u go'aamiyo in Xeerka la waafaqay;
t) waxa uu dalbi karaa soo saaridda, kormeeridda, baaridda iyo xuquuqda lahaanshaha (copyright ownership), diiwaanka, xogta iyo wixii kale ee dokumeenti ah ee la xiriira Xeerakan ku saabsan Deegaanka iyo maareynta kheyraadka debiiciga;
j) baarintaanka iyo wareysiga si loo hubiyo in la waafaqay Xeerkan;
x) ururinta iyo keydinta saamiyada (samples) lagu ururiyey waxyaabaha la xiriira Xeerkan, iyo u gudbinta saamiga (sample) si loo tijaabiyo ama loo baaro;
kh) in ay kormeer joogto ah ku sameeyaan goobaha dhulka ay ka shaqeeyaan, goobahaas oo lagu soo saaro, dhoof lagu keeno, laga dhoofiyo, lagu keydiyo, lagu iibiyo, lagu qaybiyo ama lagu isticmaalo waxyaabo saameyn weyn ku yeelan kara Deegaanka, si loo hubiyo in la raacay shuruudaha ku qoran Xeerakan;
d) in ay sameeyaan kormeer kasta oo loo baahdo si loo hubiyo in la waafaqay Xeerkan;
r) iyagoo adeegsanaya hay'adaha sharciga in ay gacanta ku dhigaan warshad, qalab, walax ama wax walba oo ay u arkaan in loo adeegsaday fulinta fal-dembiyeed lid ku ah Xeerkan ama shuruucda hoos yimaada;
s) waaxda sahminta saamaynta deegaanku markay hesho warbixin kormeer oo caddeynaysa in lagu xad gudbo xeerkan, waxay amraysaa iyadoo adeesanaysa hay'adaha sharciga in la xiro goobta wax soo saarka ee denbiga gashay;

sh) in ay Deegaankaka soo saaraan ogeysiin u digeysa cid walba oo warshad ka shaqeysa ama wadda hawlo kale oo waxyeello ku ah Deegaanka, kana hor-imaneysa Xeerkan;

dh) In ay ku amraan boliiska in uu soo qabto qofka loo arko in uu ku xad-gudbay Xeerkan.

(2) Kormeeraha Deegaanka, mar kasta oo loo baahdo, waxa uu qalab (equipment) ka taagi karaa dhul, dhisme ama gaadiid si uu u hubiyo in la waafaqay Xeerkan.

(3) Marka uu kormeeraha Deegaanku iridaha isugu dhufanayo (xirayo) warshad ama amar ku bixinayo in la joojiyo hawl socota sida ku qeexan faqradaha (1) (h), waxa uu bixinayaa ogeysiin hagaajin (improvement notice) sida ku cad faqradda (1) xarafkeeda (i).

(4) Marka uu gudanayo xilkiisa sida ku xusan qodobkaan kormeerahaDeegaanku waa in uu si wanaagsan dadka ugu sheegaa qofka uu yahay iyo hawsha uu u socdo.

## QAYBTA 9aad

## *XOGTA DEEGAANKA, WAXBARASHADA, CILMI-BAARISTA IYO KA QAYB-GALKA BULSHADA EE GO'AAMADA QUSEEYA DEEGAANKA*

### Cutubka 1-aad
### XogtaDeegaanka

### Qodobka 80-aad
### Xorriyadda Helitaanka Xogta Deegaanka

(1) Marka la eego axkaamta ku xusan faqradda (2), muwaaddin walba oo Puntland ku nool waxa uu xaq u leeyahay in uu helo xogta u furan dadweynaha ee ku saabsan fulinta Xeerkan, iyo xogta ku saabsan xaaladda uu ku sugan yahay Deegaanka, iyo khatarta jirta ama ku iman karta Deegaanka, oo ay ku jirto wasakh walba oo lagu shubo biyaha, ciidda, hawada ama dhulka iyo weliba qubidda wasakhda halista ah.

(2) Codsi xog-doon ah ee ka dhasha faqradda (1) waa la diidi karaa-

b) haddii qayb ka mid ah xogta la doonayo aysan weli dhammeystirneyn, ama weli soo shaac bixin ama haddii codsigu yahay mid aan maan-gal ahayn ama aan faah-faahsaneyn;

t) haddii xogtu wax u dhimeyso nidaamka iyo kala-dambeynta (public order) ama amniga qaranka;

j) haddii lagu dhowrayo ganacsiga ama sirta wax-soo-saar (industrial secrets);

x) haddii la fahmi kari waayo waxa la codsanayo; ama

kh)Haddii cidda/qaybta xogta laga raadinayo aanay xogtaas waxba ka hayn.

(3) Haddii ay dhacdo in la diido codsi xog-doon, cidda diidmada sameysa waa in ay la timaaddo qoraal ay ku sheegeyso sababta ay u diidday.

(4) Wasaaraddu waxa ay daw (xaq) u leedahay helitaanka xogta ku saabsan fulinta Xeerkan, iyo xaaladda uu Deegaanku ku sugan yahay, iyo weliba khatarta jirta ama ku soo food leh Deegaanka, oo ay ku jiraan wasakhda lagu shubo biyaha, hawada, dhulka iyo daadinta wasakhda halista ah, si ay ugu suurto-gasho in ay gutaan xilalkooda ku aaddan Xeerkan ama shuruucda kale ee saldhigga u ah ilaalinta Deegaanka iyo ka faa'ideysiga kheyraadka debiiciga ah.

## Qodobka 81-aad
## Awoodda Ururinta, Asal-baarka iyo Faafinta Xogta Deegaanka

Wasaaraddu waa inay:-

b) Ururisaa xogta ku saabsan Deegaanka iyo kheyraadka debiiciga;
t) iyada oo u hoggaansameysa shuruucda qoran, waa inay gacanta ku dhigtaa wixii xog ah ee laga hayo Deegaanka iyo kheyraadka debiiciga;
j) lafa-gurtaa xogta ku saabsan Deegaanka iyo kheyraadka debiiciga;
x) dadka gaarsiisaa ama ku faafisaa xogta;
kh) Cid kale u dirtaa in ay daraasad ka sameyso waxyaabaha saameynta ku leh Deegaanka iyo arrimaha horumarinta;
d) Fulisaa ololeyaal iyo barnaamijyo wacyi-gelin dadka lagu barayo Deegaanka.
r) xogta la wadaagtaa hay'adaha ama ururrada aan dawliga ahayn ama ururrada kale ee heer gobol ama heer caalami;
s) kala shaqeysaa wasaaradda ay khuseyso dhanka maareynta Deegaanka;
sh) kala talineysaa Wasiirka xogta wixii ka dhiman ama baahi ah ee jirta; ama
dh) Dejineysaa, iyada oo la tashaneysa Wasaaradaha ay qusayso, tilmaameyaal ama shuruudo lagu soo ururiyo, lagu kala saaro, laguna baahiyo xogta ku saabsan Deegaanka.

## Qodobka 82-aad
## Kaydka Dhexe ee Xogta Deegaanka

Wasaaraddu waxa ay dhisaysaa, isla markaana hawl-gelinaysaa qaab loo keydiyo xogta guud ee Deegaanka, halkaas oo ay ku kulmayaan natiijo walba, xog kasta iyo tiro-koob kasta oo ay Deegaanka ka soo ururiyeen hay'adaha aan dawliga ahayn iyo kuwa dawliga ah.

## Qodobka 83-aad
## Warbixinta Xaaladda Deegaanka

(1) Wasaaraddu shantii sano mar ayay soo saaraysaa warbixin ku saabsan xaaladda Deegaanka iyo maareyntiisa, taas oo la hor-geynayo Baarlamaanka.
(2) Wasaaraddu waxa ay soo saari kartaa ama daabici kartaa xog walba oo ay u aragto in dadku ka baran karaan Deegaanka iyo arrimaha la xiriira.

## Cutubka 2-aad
## Waxbarashada iyo Cilmi Baarista Deegaanka iyo Ka Qaybgalka Dadwayne ee Go'aamada Deegaanka

### Qodobka 84-aad
### Waxbarashada Deegaanka iyo Wacyi-gelinta

(1) Wasaaraddu, iyada oo la tashanaysa wasaaradda waxbarashada, waa inay xaqiijisaa ku darista aqoonta barashada Deegaanka iyo ilaalintiisa manaahijta waxbarashada dugsiyada.

(2) Wasaaraddu waa inay qorsheysaa, isla markaana fulisaa barnaamijyo kor loogu qaadayo aqoonta dadku u leeyahay hababka horumarinta waarta iyo maareynta Deegaanka.

(3) Wasaaraddu iyadoo la kaashanaysa Wasaaradda Waxbarashada waa in ay u hawgashaa dhisme iyo hirgelinta Machadka Culuumta deegaanka.

### Qodobka 85-aad
### Cilmi-baarista Deegaanka

(1) Wasaaraddu waa inay daraasado ka sameysaa xaaladda uu ku sugan yahay Deegaanka, waxa ayna cilmi-baaris, iyo saadaal, ku samaynaysaa isbeddellada ku dhici kara Deegaanka iyo wixii daraasado kale ah ee wax ku biirin kara dejinta siyaasado, iyo diyaarinta qorsheyaal ku saabsan maareynta iyo daryeelka Deegaanka.

(2) Wasaaraddu waa in ay samaysaa xarun cilmi baarista Deegaanka oo shaqadeedu tahay isku dubaridka cilmi barista, abuurista xogta ku saabsan deegaanka, la socoshada iyo saamaynta daraasado lagu hubinayo wax ku oolnimada tallaabooyinka la qaadayo.

### Qodobka 86-aad
### Ka-qayb galka dadweyne ee go'aan qaadashada arrimaha Deegaanka

(1) Dadwaynuhu waxa ay xaq u leeyihiin in wakhti hore lala socodsiiyo qorshaha ay mas'uuliyiintu ku fulinayaan go'aan kasta oo saameyn ku yeelan kara Deegaanka iyo weliba fursadaha ay kaga qayb-geli karaan go'aamadaas.

(2) Dadwyanuhu waxa ay xaq u leeyihiin in ay ka qayb galaan go'aannada lagu dejinayo siyaasadaha Deegaanka, qorsheyaasha fog iyo kuwa dhow, iyo barnaamijyada iyo in ay ka qayb-galaan diyaarinta shuruucda iyo xeerarka la xiriira Deegaanka.

(3) Xogta ku saabsan go'aannada saameynta ku leh Deegaanka waxa loo bandhigayaa dadawaynaha ka hor inta aan la gaarin go'aan.

(4) Ka qayb-galka bulsho ee go'aamada la xiriira Deegaanka waa in loo maamulaa sidan-

b) in dawayanaha wakhti hore loo sii sheego in go'aan la gaarayo, sida dejinta siyaasadaha, qorsheyaasha iyo barnaamijyada la xiriira Deegaanka;
t) in dadwaynaha loo muujiyo in ay talo-bixin af iyo qoraalba ka geysan karaan siyaasadaha la soo bandhigayo, qorsheyaasha iyo barnaamijyada; iyo
j) In dadwaynaha loo oggolaado xogta ku saabsan Deegaankasi waafaqsan Xeerkan ama shuruucda kale ee jirta.

(5) Wasaaradda iyo wasaaradaha kale ee ay khuseyso, iyo wakaaladaha, waa inay dhaqan-geliyaan habab loo ururiyo, loogana jawaab celiyo, talooyinka, walaaca iyo su'aalaha dadwaynaha qabaan ee ku saabsan arrimaha la xiriira go'aannada Deegaanka, sida -

b) Qabashada dooda furan (public debates) iyo dhegeysi (hearing); iyo
t) Yagleelidda xarumo ka warbixiya xaaladda Deegaan, diiwaanno iyo miiska la geeyo cabashooyinka (complaints desks).

## QAYBTA 10-aad
## HESHIISYADA CAALAMIGA

### Qodobka 87-aad
### Heshiisyada Caalamiga ah ee Deegaanka

(1) Haddii Soomaaliya ay qayb ka tahay heshiisyada caalamiga ah ee maareynta Deegaanka, Wasaaraddu, iyada oo la tashanaysa wasaaradaha ay khuseyso, waa inay :-

b) Codsi sharci ah u soo jeedisaa Wasaaradda Caddaaladda si ay u aqoonsadaan heshiisyadaas , gacana uga gaystaan in Puntland iyadoo qayb ka ah Soomaaliya, gudato waajibaadka ka saran hirgelinta heshiisyadaas;
t) Astaysaa qaabab kale oo lagu dhaqan-gelin karo heshiisyadaas, iyada oo lala kaashanayo wasaaradda ku shuqul leh ee heer Federaal.

(2) Marka laga hadlayo heshiisyada caalamiga ah ee ku saabsan Deegaanka, Wasaaraddu waa inay ay hay'dda dhigeeda ah ee heer Federaal gacan ka siisaa wixii wada-xaajood ah ee ku saabsan heshiisyadas.

(3) Wasaaraddu waa inay diiwaangelisaa dhammaan baaqyada, axdiyada iyo heshiisyada caalamiga ah ee Soomaaliya qaybta ka tahay lana xiriira Deegaanka.

**Qodobka 88-aad**
**Barnaamijyada Lagu Maareynayo qashinka iyo sumaha isaga goosha Xuduudaha**

(1) Wasaaraddu, ka dib marka ay la tashato Wasaaradaha ay khuseyso, waxa aymaamullada dalalka deriska ah la yeelan kartaa wada-xaajood ku saabsan barnaamijyada lagu maareynayo Deegaanka iyo siyaabaha looga hor-tegi karo ama hoos loogu dhigi karo saameynta Deegaan ee qashinka iyo sumaha isaga kala goosha xuduudaha.

(2) Wasaaraddu, iyada oo la kaashanaysa wasaaradda qaabilsan ee heer Federaal, waa inay hirgelisaa wixii barnaamijyo ah ee ku saabsan maaraynta qashinka iyo sumaha isaga gudba xuduudaha aan la leenahay wadamada deriska.

**QAYBTA 11-aad**
**AXKAAMTA LA XIRIIRTA MAALIYADDA IYO DHAQAALAHA**

**Qodobka 89-aad**
**Dhaqaalaha Wasaaradda**

(1) Xeerakani waxa uu yagleelayaa sanduuq dhaqaale oo lagu daryeelo Deegaanka (environmental trust fund).

(2) Ilaha dhaqaalaha sanduuqa waa in ay ka koobnaadaan—

b) Dhaqaalaha ay bixiso dawladdu heer Puntland iyo heer Federaal;
t) Khidmadaha la qaado ee ku xusan Xeerakan iyo xeerarka kale ee xiriirka la leh;
j) Khidmadaha ka soo xerooda adeegyada ay Waasaaraddu bixiso;
x) Ganaaxyada laga qaado jebinta axkaamta Xeerka iyo shuruucda hoos yimaada;
kh) Deeqaha iyo qaaraanka meelo kale kasoo xerooda.

**Qodobka 90-aad**
**Maamulka Sanduuqa Dhaqaalaha**

(1) Wasaaradda ayaa mas'uul ka ah maamulka Sanduuqa.

(2) Wasaaraddu waxa ay siin kartaa dhaqaale cidii ku hawlan daryeelka Deegaanka iyo maareynta kheyraadka debiiciga ah.

(3) Wasaaraddu waxa ay gacanta ku haynaysaa akoonnada bangiga lacagta Shillin Soomaaliga ama lacagaha qalaad ee sanduuqa.

**Qodobka 91-aad**
**Xilka Ku Shaqeynta Hab-maamul Maaliyadeed hufan**

Wasaaradda iyo hay'adaha kale ee lagu dhisay Xeerakan waa inay waajibaadkooda u gutaan hab waafaqsan mabaa'diida maaliyadeed ee daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka (transparency and accountability) iyagoo xaqiijinaya in dakhligu noqdo mid si ku filan u daboola kharashka .

**Qodobka 92-aad**
**Qiyaas kharasheedka ee Wasaaraddu u baahan tahay**

(1) Wasaaraddu waxay diyaarinaysaa Miisaaniyad sannadeed ay ku muujinayso dakhliga iyo kharashka wasaaradda iyadoo u gudbinaysa wasaaradda Maaliyadda si loogu daro Miisaaniyadda dalka.
(2) Waxaa Maaliyadda wasaaradda loo maamulayaa hab waafaqsan nidaamka maamul maaliyadeed ee dalka.

**Qodobka 93-aad**
**Akoonnada, hanti-dhawrka iyo Warbixin Sanadeedka**

(1) Madaxa xisaabaadka Wasaaradda waa inuu si wanaagsan u kaydiyaa ama u hayaa xisaabta iyo diiwaanka dhamaan wixii la kala gato (transactions) iyo arrimaha la xiriira akoonada xisaabaadka , waana in uu xaqiijiyaa in lacagta soo xeroota oo idil loo xereeyo, loo bixiyo, loona saxiixo si waafaqsan sharciga, isla markaana hantida iyo deynta (assets and liability) si wanaagsan loo maamulo , loona xakameeyo.
(2) Akoonnada lacagaha iyo maaliyadda wasaaradda waa in uu sanad walba xisaabi xil maleh (dabagal) ku sameeyaa xafiiska Hanti Dhawrka a Guud (Auditor General Office).
(3) Madaxa xisaabaadka Wasaaraddu , waa inuu soddon casho gudahood sanadku marka uu dhammaado, usoo gudbiyaa —

b) Wasaaradda warbixin sanadeed ku saabsan sanad xisaabeedka, warbixintaas oo ka kooban

i. xisaab xirrada (financial statements);
ii. warbixinta habka loo isticmalay lacagaha ; iyo
iii. wixii kale oo xog ah ee Wasaaraddu u baahato;

t) Hanti dhawrka warbixin xisaabeed ka kooban:-

i. akoonnada keydka dhaqaalaha ee sanadka; iyo
ii. Warbixinta sannadka ee ku xusan faqradda (3) xarafka (b).

(4) Hanti-dhawrka Guud waa in uu dabagal (xisaabi xil-maleh) ku sameeyaa akoonnada Wasaaradda, isagoo laba bilood gudahood kusoo gudbinaya wixii uga soo baxay dabagalka xisaabeed ee uu sameeyay.

(5) Wasaaraddu waa inay nuqullo ka samaysaa warbixin sanadeedka iyo jawaabaha uu bixiyey Hanti-dhawrka Guud, si loo hor geeyo baarlamanka soddon casho gudahood marka jaawaabaha Hanti-dhawrka ay soo gaaraan.

### Qodobka 94-aad
### Awoodaha Wasaaradda Maaliyadda ee dhanka Canshuuraha iyo Khidmadaha

(1) Iyada oo aan lagu xad gudbayn shuruucda u deggsan cashuuraha, Wasaradda maaliyaddu, ka dib marka ay la tashato Wasaaradda, waa in ay miisaaniyadda sanadlaha ah ku dartaa —

b) khidmadaha laga qaado dadka isticmaala kheyraadka Deegaanka;

t) Ganaaxa laga qaado cidda waxyeello u geysata kheyraadka Deegaanka ama sababta dikhow (wasakh);

j) Khidmadaha laga qaado alaabooyinka iyo qalabka waxyeelada u gaysta Deegaanka iyo caafimaadka (taxes levied on polluting or environmentally harmful substances or materials).

(2) Khidmooyinka ama canshuuraha ku xusan faqradaha (t) iyo (j) waxaa lagu go'aaminayaa xeer golayaasha dawladu ansixyeen.

(3) Wasaaradda Maaliyaddu waa inay canshuur dhaaf ama canshuur dhimis u samaysaa dhammaan qalabka, agabka iyo hawlaha lagu dhiirigelinayo Deegaannada nadiifka ah, laguna yagleelayo hab bedel ka noqda tamarta dhuxusha iyo xaabada.

## QAYBTA 13-aad
## RACFAAN QAADASHADA, BAARITAANKA
## DEMBIYADA IYO HABRAACOODA

### Qodobka 95-aad
### Racfaan ka Qaadashada Go'aamada Maamul ee Wasaaradda

(1) Qof kasta oo aan ku qancin go'aamada Wasaaradda waxa uu xaq u leeyahay in uu racfaan u qaato maxkamadda sare ee Puntland muddo soddon casho gudohood ah isaga oo raacaya hababka rafcaanka looga qaato go'aamada maamulka ah (administrative decisions).

(2) Go'aanka maxkamadda sare ka gaarto dacwadaas waxaalaga soo qaadayaa mid Kama dammays ah oo aan racfaan dame laga qaadan Karin.

## Qodobka 96-aad
## Baaritaanka Dembiyada

(1) Qof walba oo ka war haya xad-gudub lagu sameeyey Xeerkan ama shuruucda hoos yimaada, waxa ay warbixin u gudbin kartaa laamaha fulinta sharciga ee awoodda u leh.

(2) Hay'adda sharci fulin ee awoodda u leh waa in ay baaris ku sameysaa warbixinta ku xusan faqradda (1) isla markaana haddii la helo caddeyn ku filan in dembi la galay, hay'adda sharci fulin waa inay dacwadda kusoo oogtaa cidda la sheegay in ay denbiga gashay

(3) Xeer ilaalinta guud xil ayaa ka saran dhaqaajinta dacwadaha la xiriira xeerakan ee lidka ku ah Deegaanka iyada oo dhammaan hababka baarista denbiyada xeerakan u raacaya hab waafaqsan Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed ee Xeer Lr.1 /1964 iyo xeerarka kale ee la xiriira.

## Qodobka 97-aad
## Is-hortaagga Fulinta Xeerka

Qofkii gacan u qaada, xanniba ama carqaladeeya sarkaalka loo xil saaray gudashada hawl ka mida hawlaha uu xeerinayo xeerakan ama xeer hoosaadyada kale ee hoos yimaada waxa uu gelayaa dembi, waxaana lagu ciqaabayaa marka ay ku caddaato, xabsi u dhexeeya hal sanno ilaa saddex sanno iyo ganaax aan ka badneyn toban milyan Sh.So ama labada ciqaabood oo wada socda.

## Qodobka 98-aad
## Qaadista Mas'uuliyadda iyo Magdhaw ka bixinta dhibta deegaan ee Dhacda

(1) Qof kasta oo falkiisu ama dayacaadiisu uu sababo dhibaato soo gaarta Deegaanka ama cid kale taas oo xadgudub ku ah axkaamta ku xusan Xeerakan ama xeer hoosaadyada kale ee lagu fulinayo xeerakan, waxa loo raacayaa kharashka ku baxaya dhayidda ama wax ka qabashada dhibta uu gaystay , wuxuuna ka koobnaan karaa:

b) Kharashka wax lagaga qabanayo dhibtii Deegaan ee uu gaystay iyo nadiifiintiisa.
t) Magadhawka dhibta soo gaartay hantida ama dadka.

(2) Soo gudbinta ama xeraynta dacwad ku saabsan dhib ka dhalatay hawl Deegaanka laga qabtay waa in aan lagu celin ama lagu diidin waqti dhaaf (in dacwadda xilligeedii la dhaafay).

## QAYBTA 14-aad
## QODOBO QUBANE AH

### Qodobka 99-aad
### Ku dhafidda arrimaha Deegaanka xeerarka qaybaha kale

(1) Wasaaradaha iyo wakaaladaha ay qusayso, iyaga oo la kaashanaya wasaaradda, waa in ay qaadaan tallaabooyin ku habboon oo lagu maaraynayo arrimaha Deegaanka, oo ay ka midyihiin daaqa, caafimaadka guud, beeraha, biyaha iyo qaybaha kale ee xiriirka la yeelan kara ilaalinta Deegaanka si waafaqsan xeerarka degsan.

(2) Haddii ay jiraan xeerar hore loo dejiyay waa in hay'adaha kor ku xusan dib u eegis ku sameeyaan si ay u xaqiijiyaan in arrimaha ilaalinta Deegaanka ee xeerakan ku xusan lagu daro xeerarkaas horay u degsanaa.

### Qodobka 100-aad

### Soo saarista xeer-hoosaadyo

Wasaaraddu waxay soo saari kartaa, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ama hay'adaha ay khusayso, xeer hoosaadyo la xiriira:-

b) Arrin kasta oo uu sharcigan ogolaaday in xeer hoosaad loo sameeyo;
t) Hirgalinta iyo fulinta waaxyaha ay khusayso ee hay'adaha dawladdu u dhaqan galinaya Xeerkan.
j) Wixii kale ee lagama maarmaan ah ama ah hab la dejiyo si loogu guuleysto ama sare loogu qaado ujeedooyinka Xeerkan.

### Qodobka 101-aad
### Burin

Waxaa la buriyey Xeer kasta oo ka hor-imaanya ama la socon Karin Xeerkan

### Qodobka 102-ad
### Dhaqangalka Xeerka

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa Marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland Saxiixo, laguna soo saaro faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

**Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland.**